

WAXA UU DOONAYO

Adeer Saam

Nacuum Jomaski



Turjume

Cabdillaahi Axmed Faarax

Xuquuqda buuggani waxa ay u dhawran tahay turjumaha buugga. Buuggan nuqul laga ma samayn karo, lama daabici karo, lagama ganacsan karo, si kalana loogu ma tagrifali karo, iyada oo aan oggolaansho rasmi ah turjumaha laga haysan.

Tifaftirka & Cabbirka Buugga

Faarax Biniin Boos

Daabacaaddii 1^{aad}

(2024)

Tusmo

Yoolasha Siyaasadda A/D/Maraykanka	7
Ilaalinta Dhulkeenna (Maraykanka)	8
Xagjirka Libraaliga ah	12
Geyiga Weyn	16
Soocelinta Nidaamkeennii Soojireenka Ahaa	19
Uheellanaanta Dimuqraadiyadda	28
Halista Tusaalaha Wacan	32
Caalamka Saddex Xagalka ah	38
Burburinta Bannaanka ah	42
Siyaasadda Deriskeenna Wanaagsan	43
Deldelaaddii Salfadoor	51
Nikaragwa oo Cashar Loo Dhigay	60
Guwaantameella oo Goob Dagaal	69
Laga Dhigay	69
Tallaaliddii Koonfur Bari Aasiya	82
Dagaalkii Khaliijka	87
Kiraysiga Shuftada	94
Maandhaq	101
Warbaahinta	106
Aayaha	109
Isbeddelka Waayaha	109
Maxaan Beddeli Karnaa?.....	111
Gobannimadoonku Ha Socdo	113

Hordhac

Buuggan asalkiisu waa waraysiyo laga qabtay Nacuum Jomaski, waxa uuna buug ahaan u soo baxay 1992, waxaana Carabi loo turjumay 1998.

Nacuum Jomaskii waa aqoonyahayn haysta dhalashada Maraykanka, isir ahaanna Yuhuudi ah, waxa uuna dhashay 1928, waana barafasoor cilmiga afafka ku takhasusay, ahna faylasuuf iyo gorfeeye siyaasadeed. Buugta uu qoray waxa ay kor u dhaafeen boqol. Waxa uu aad caan ugu noqday naqdintiisa siyaasdaha Maraykanka iyo Israa'iilba.

Buuggani waxa uu gorfaynayaa siyaasadda arrimaha dibadda ee Maraykanka, waxa uuna soo qaadanaayaa dhacdooyinkii iyo dagaalladii dhacay dagaalkii labaad kadib ilaa iyo 1992.

Waxa uu akhristaha hordhigayaa ujeedooyinkii dagaalladaas ka dambeeyay, waxa uuna barayaa sida siyaasadda arrimaha dibadda ee Maraykanku ay u shaqayso.

Soojeedinta iyo gorfaynta Jomaski ma aha mid mala'awaal ah ama baasaysi keliya ah ee waxa uu ku xoojinayaa tixraacyada iyo xogaha uu ilaha rasmiga ah ka soo dheeganayo ee aad buugga ugu dhex tegi doontid.

Waxaa suuragal ah in xogaha aad buugga ugu tagtaa ay wax ka beddelaan aragtidiis aad ka

haysatay dagaallada Bariga Dhexe, bariga fog iyo galbeedka shishaba, waxaana macquul ah in aad fahanto wax ka mid ah qaabka ay u shaqayso siyaasadda dunidu.

Jomaski waa Yuhuudi Ameerikaan ah, haddana aan oggolaan xadgudubyada ay dadkiisa iyo dalkiisuba ku kacayaan, taa ka soo horjeedkeedana noqday cod dheer oo la safta dhibbanayaasha iyo looma'ooyaanka.

Dadaallada Jomaski kuma eka siyaasadda iyo warbaahinta, mana uusan gabin kaalintiisii aqoonyahannimo, se waxa uu dadaallo wax-ku-ool ah ku darsaday cilmiga afafka iyo falsafaddaba.

Buuggan waxaa afka Carabiga u rogay Caadil Almucallim. Turjumaadda Caadil ayaan helay oo aan akhriyay, markaa kadib, ayaa ay igu dhalatay in aan Soomaaliyeeyo, in kasta oo uusan Caadil isku hawlin turjumaadda xarfiga ah amaba uu mararka qaar tuducyo isha ka laliyay, se waxa uu si fiican u soo turjumay buugga, isaga oo nuxurkiina si fiican u abbaaray.

**Yoolasha Siyaasadda Arrimaha Dibadda
Maraykanka**

Ilaalinta Dhulkeenna (Maraykanka)

Maraykanka iyo dawladaha kale waxa uu xidhiidhkoodu soo taxnaa ilaa iyo bilowgii taariikhda Maraykanka. Laakiin dagaalkii labaad ee adduunku waxa uu ahaa isgoys, sidaa darteed halkaa ayaa aynnu ka bilaabaynaa.

Dagaalkaasi waxa uu taagdarreeyay badanka dawladihii innala tartamayey, ilaa uu qaarkood burburiyayba, meesha innaga waxsoosaarkeennii uu saddex jeer laba jibbaarmay, soohdimaheennana aysan cidnaba soo hawaysan karayn.

Xitaa Maraykanku waxa uu la wareegay hoggaanka dawladaha warshadleyda ah laga soo bilaabo bilowgii qarnigan, dagaalkii kadibna 50% hantida caalamka ayaa innoo soo gacan gashay, waxa aynnuna maamulnay labada bad weyn ee Baasifigga iyo Atlaantigga, sooyaalkana hore uma dhicin in dawladi ay hesho awood ay ku maamusho dhul intaa baaxad le'eg iyo nabadgelyo itaa le'eg toonna.

Qorsheeyayaasha siyaasadda Maraykanku waxa ay garteen in aan dagaalka ka faraxalan doonno innaga oo ah awoodda keli ah ee ugu taagta roon. Intii dagaalka lagu jiray iyo markii laga soo baxayba waxa ay qorshaynayeen sidii uu caalamku dagaalka kadib u ekaan lahaa.

Maadaama oo ay bulshadeennu tahay mid maan furan, waxa aynnu si cad oo aan gabbasho lahayn u akhrinaynaa qorshayaashaas. Waxa ay is ku waafaqeen qorsheeyayaasha Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo guddiga xidhiidhada dibaddu (oo ah mid ka mid ah kannaallada ugu weyn ee ay hormuudka hantiilayaashu saamaynta ugu yeeshaan siyaasadda arrimaha dibadda) lamahuraannimada ilaashiga gacansarraynta Maraykanka, laakiin waxa aad la isugu khilaafay qaabkii arrinkan loo hirgelin lahaa.

Qolyaha xagjirka ah waxa aynnu ka helaynnaa aragtidooda dokumentiga golaha Amniga Qaranka, lanbarka 68, sannadkii 1950 (1950 NCS 68), kaas oo caddaynaya aragtidii Wasiirka Arrimaha Dibadda Diin Ajisoon 'Dean Acheson', ee uu qoray Baawl Niitis 'Paul Nitze', kaas oo weli isla shaqadii haya (waxa uuna ahaa mid ka mid ah kuwii Riigan 'Reagan' ku metalayay wadahaadalladii xadaynta hubka). Aragtidaasi waxa ay ahayd in la wiiqo Midowgii Soofiyeet, iyada oo gudaha nidaamkiisa lagu beerayo iniinaha burburka, ilaa inta ay innooga suuragalayso in uu soo fadhiisto miiska wadahaadalka isaga oo shuruuddeenna u hoggaansan.

Siyaasadda ku qoran dokumentigaas waxa ay keensanaysaa (naf-hurid iyo is-xakamayn). Si kale haddii aan u dhigno, waxa ay doonaysaa dhaqaale badan oo lagu bixiyo ciidanka iyo dhaqaalaha lagu bixinayo arrimaha bulshada oo la yareeyo. Waxa lagama-maarmaan ah in la yareeyo isudulqaadashada badan ee keenaysa is maandhaafka gudaha ah, ee aan loo baahnayn. Siyaasadahaasi waxa ay ahaayeen kuwo la fuliyay.

Shabakadda basaasiinta bariga Yurub ee Maraykanka waxa sannadkii 1949, madax looga dhigay Riinhaad Gahlan 'Reinhard Gehlen' oo ahaa hoggaamiyihii hore ee sirdoonka Millateriga Naasiga dhanka bari. Shabakaddani waxa ay ahayd mid ka mid ah jaadadkii iskaashi ee dhex maray Maraykanka iyo Naasiyada, Riinhaadna waxa uu kaalmaystay dambiilayaal badan oo qayb libaax ka qaatay ballaadhinta hawlgalladii uu ka waday Laatiin Ameerika iyo meelo kaleba.

Wadashaqayntan Maraykanka iyo Naasiyiinta u dhexeysa waxaa ku shaqo galay ciidan qarsoon oo ka mid ahaa sirdoonkii u shaqayn jiray Hitler, kuwaas oo kaalintoodu ahayd ka-dhexshaqaynta Midowgii Soofiyeet iyo Yurubta bari, bilowyadii kontameeyadii. (Arrinkan waa arrin laga ogyahay Maraykanka, cid kala jecelna

aysan jirin, se waxa la danayn lahaa haddii taa ka soo horjeedkeeda aynnu ogaan lahayn in Midawgii Soofiyeeti uu wakiillo iyo sahay u diray ciidammadii uu Hitler ka aasaasay buuraha Rooki ee Ameerika).

Xagjirka Libraaliga ah

Qorsheeyayaasha siyaasadda arrimaha dibadda ee Maraykanku waxa ay ka kooban yihiin laba kooxood: kooxi waa kooxda xagjirka ah oo aragtidoodu waxa ay ku qornayd dokumentiga lanbarkiisu 68 ahaa (NCS 68) ee aynnu soo sheegnay, waana la fuliyay wax badan oo wixii ku qornaa ka mid ah. Qolada kale waxa lagu magacaabaa Qoolleyda, oo waa qolada aan xagjirka isku aqoon ee dhanka nabadadda u janjeedha. Bal qoladanna aynnu dhuganno aragtidooda. Qoladana waxa hormuud u ah Jooj kaynaan 'George Kennan' oo madax ka ahaa Wasaaradda Arrimaha Dibadda qaybteeda qorshaynta ilaa 1950. Waxa jagadaa uga dambeeyay Niitis. Waxa kale oo uu Kaynaan masuul ka ahaa shabakaddii Gahlan.

Kaynaan waxa uu ahaa qorsheeyayaashii Maraykanka kuwoodii ugu cadcadadaa uguna fariidsanaa, waxa uuna kaalin buuxda ku leeyahay qaabaynta caalamka kadib dagaalkii labaad ee adduunka, qoraalladiisuna waxa ay sawir fiican innaga siinayaan saamayntii Qoolleyda. Kaynaan waxa uu sannadkii 1948, qoray dokumentiga lanbar 23 ee khuseeya qorshaynta siyaasadda, waxa uuna yidhi: "Hantida caalamka 50% gacanteenna ayaa ay ku jirtaa innaga oo adduunka 6.3% ka ah,

xaaladdan oo kalena suuragal maaha in aynnu ka badbaadno quudhiwaaga iyo hagardaamooyinka dadka kale. Muhiimadda dhabta ah ee inna sugaysaa waa in aan xidhiidhadeenna ku salaynno wixii innoo dhawraya kalasarrayntaa innaga iyo dadka kale innoo dhaxeysa. Si aynnu uga dhabayno qodobkan waa in aynnu iska illawnaa riyoooyinka qurxoon iyo calool-jileecaba, aynnuna xoogga saarnaa yoolkeenna qawmiyadeed. Waa in aynnu iska joojinnaa hadallada dahsoon iyo yoolasha aan dhabta ahayn ee ay ka mid yihiin Dimuqraadiyadda, xuquuqda aadanaha, kor-uqaadidda maciishadda iyo u digarogashada Dimuqraadiyadda. Ma foga maalinka aynnu u baahan doonno in aynnu awooddeenna adeegsanno, mar kasta oo ay yaraadaan caqabadaha ka dhasha hal-ku-dhegyadaa waa mar kasta oo aynnu sii fiicnaanno.”

Qoraalkani (PPS 23) waxa uu ahaa mid qarintiisa aad loogu dadaalay, halka caammada iyo dhegweyntu ay la mirqaansanaayeen hal-kudhegyadan quruxda badan, ilaa maanta arrinka taagani waxa uu ku qotomaa diraasaddaas, qorshe dejiyayaashuna iyaga uun baa is af yaqaan.

Isla dariiqadan laftigeeda, Kaynaan waxa uu ku baraarujiyay safiirrada Maraykanka u jooga

dalalka Laatiin Ameerika in muhiimadda koowaad ay tahay in aan ilaashanno macdanta ceedhiin ee aan ku leennahay Laatiin Ameerika iyo in aan la dirirno munaafaqadda dalalkaa ku faafsan, sida ku xusan warbixinta sirdoonka Maraykanka, munaafaqaddaas oo ah: in dawladdu ay masuul ka tahay badhaadhaha shacabka.

Maraykanku fikraddan waxa ay ku daabaqadeeyeen Midawgii Soofiyeet, iyaga oo iska indhatiray cidda dhabta ah ee fikraddan qabta (dawladdu in ay masuul ka tahay badhaadhaha shacab).

Qodobkan waaba la caddeeyay oo diraasad heerkeedu sarreeyo oo soo baxday sannadkii 1955, ayaa lagu xusay in halista u weyn ee innaga soo waajahaysa dawlada Shuuciga ah ay tahay in aysan oggolayn in ay reer galbeedka dabadhilif u noqdaan (oo kaabaan dhaqaalaha reer galbeedka ee ku salaysan wershadaha).

Kaynaan waxa uu faahfaahiyay qaababka lagaga hortagi karo cadaawgeenna fikraddaas qaatay: “Jawaabta kama dambaysta ah waxa laga yaabaa in aysan noqon mid loo riyaayo, laakiin, waa in aynnaan ka labalabayn in aan u adeegsanno booliska xukuumadaha maxalliga ah hub cabudhineed, mana aha in aan arrinkaas ka sarriiganno; illeyn shuuciyiintu waa khiyaano

badanyihiine. Dawlad Leebraali ah oo isudulqaadasho iyo tasaamux ka jiro, shuuciyiintuna u soo dhuuntaan, waxaa ka fiican xukuumad adag.”

Siyaasadaha noocan ahi uma gaar ahayn Leebraaliyiintii Kaynaan oo kale ahaa, laakiin soddon sano ka hor dagaalkii labaad, ayaa waxaa qodobkan baraarujiyay Wasiirkii Arrimaha Dibadda Woodrow Wilson ‘Woodrow Wilson’ isaga oo xusay in macnaha keli ah ee la hirgelin karo ee uu yeelan karo mabda’ii Monroe uu yahay: “In Maraykanku ilaashado danihiisa gaarka ah oo keliya. Nabadgelyada dalalka kelenaa aysan waxba ka gelin.” Waxa uu Wilson oo ahaa hormuudkii aaya-katalintu uu aaminsanaa in arrintan aan caammada la ogaysiin, maadaama oo aan laga dhaadhicin karin.

Isaga oo dhaqan gelinaya mabda’aas iyo arrimo kale ayaa waxa uu Wilson ku duulay Haayti ‘Haiti’ iyo jamhuuriyadda Duminikaan ‘Dominican Republic,’ waxa ayna ciidankiisu u geysteen dil, gumaad, iyo burburin ay buburiyeen nidaamkii siyaasadeed, waxa ayna gacanta ku dhigeen labada dal, iyaga oo labadii dalba u gacangeliyay diktaatoriyiin manaxayaal khariban ah.

Geyiga Weyn

Intii lagu gudo jiray dagaalkii labaad ee adduunka, waxa ay diyaarinayeen kooxo baadhitaanno waday oo ka tirsanaa Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo guddida xidhiidhada dibaddu, qorsheyaal ku saabsanaa caalamka dagaalka labaad kadib. Qorshahan ayaa ku salaysnaa wax ay ku magacaabeen “geyiga weyn,” kaas oo ay tahay in uu u hoggaansamo baahiyaha dhaqaale ee Maraykanka.

Geyiga weyn, waxa soo gudagelaya kalabadh dhulka qaybtiisa galbeed, galbeedka Yurub, bariga fog, dhulalkii uu gumeysan jiray Ingiriisku ee burburay. Sida oo kale, ilaha tamarta ee Bariga Dhexe ee aan wax u dhigmaaba jirin (taas oo ka soo wareegi doonta gacmaha labada dal ee innala tartama ee Faransiiska iyo Ingriiska, kuna soo wareegaysa gacmaheenna), iyo dhammaan inta hadhay ee caalamka saddexaad, haddii ay suuragal tahayna caalamka gebi ahaantiiba.

Geyiga weyni waa in uu u hoggaansamaa baahiyaha dhaqaale ee Maraykanka. Meel kasta oo caalamkan cusub ka tirsan waxaa loo qoondeeyay shaqo, waa in ay noqdaan dawladaha warshadleyada ah, sida Jarmalka iyo Jabbaan, goobaha ay shaqadu ka socoto, innaga oo kor ka maamulayna, halka dawladaha

caalamka saddexaadna ay noqonayaan isha laga soo dhoofsanayo macdanta ceydhiin, suuqyadoodana lagu iibinayo alaabtii la soo farsameeyay. Kaynaan waxa uu yidhi: “Waxa ay ahayd in bariga Aasiya iyo Afrika looga faa’iidaysto dib-u-dhiska Yurub iyo Jabbaan.”

Kaynaan waxa uuba ka dhigay ka faa’iidaydiga reer Yurub ee Afrika mid akhlaaqi ah. Cidna ma soo jeedin in Afrika ay ka faa’iidaydiga Yurub; si ay isu dhiso oo u hormarto.

Dokumantiyada noocan ah ma akhriyaan cilmibaadhayaal iyo mutakhasiisiin mooyee cid kale, waxaana muuqata in aysan cidna ka damqan ama aysan saluugin.

Dagaalkii Fiyetnaam waxa uu u qarxay waa xoojinta kaalintaa dabadhilifnimo, waddaniyiinta reer Fiyetnaamna ma aysan yeelin in ay kaalintaas metelaan, waxa ayna ku mutaysteen in la burburiyay oo cagta la mariyay. Fiyetnaam awoodba uma lahayn in ay cid ku duusho ama u hiiliso, laakiin in ay u madax bannaanaato arrimaheeda oo dalalka kalena ku daydaan ayaa ah halis iyo khatar.

Maraykanka laba hawlood oo muhiim ah ayaa u yaallay. Ta koowaad waa: in ay sugaan amniga ‘geyiga weyn.’ Arrinkan ayaa keensanaya in ay yeeshaan awood weyn oo argagax gelinaysa cid kasta oo ku soo dhiirrata in ay gacan

sarrayntoodaas isku soo taagaan, waana mid ka mid ah sababaha ay u samaysteen hubka Nugliyeerka. Muhiimadda labaad ayaa ah: si loo farsameeyo tiknoolajiyad hormarsan in ay xukuumaddu taageerto arrinkaas. Sababo kala duwan daraadeedna qaybo badan oo ka mid ahaa taageeradaa iyo maalgelintaa waxa la geliyay ciidanka.

Mabda'a ah ganacsiga xorta ah waxba kuma jabna marka goobaha waxbarashada iyo joornaallada lagu dhigayo, laakiin ma jirto cid xukuumadda iyo haayadaha dawlida ka mid ah oo dhab ahaan u aaminsan. Qaybaha ka midka ah dhaqaalaha Maraykanka ee awooda in ay si caalami ah u tartamaan waa kuwa dawladda ka hela taageerada: waxsoosaarka beeraha, tiknoolajiyadda hormarsan, daawooyinka iyo baayatiktiknoolajiga 'biotechnology.' Arrinkani waa ka jiraa bulshooyinka wershedleyda ah ee kale.

Dawladda Maraykanku waxa ay dusha saaratay maalgelinta cilmibaadhisyada iyo hormarinta waxa ku saabsan agabyada dagaalka. Xukuumaddu waxa ay u tahay suuq la sii hubo oo alaabtaasi iibsanaya, wixii kale ee soo hadhana waxaa kala hororsanaya mashaariicda gaarka loo leeyahay.

Soocelinta Nidaamkeennii Soojireenka Ahaa

Waxa ay garteen kuwii dejinayay qorshaha dagaalka labaad kadib, sida Kaynaan, muhiimadda ay leedahay in dib-u-dhis lagu sameeyo dawladihii warshadleyda ahaa ee reer galbeedka iyo Jabbaan ee dagaalkii ku burburay, si ay u awoodaan in ay soo dhoofsadaan agabyada lagu farsameeyo Maraykanka una abuuraan jaanisyo maalgashi, laakiin waa in tallaabadan la qaadaa iyada oo loo marayo hab sii jaan go'an.

Waa in la soo celiyaa nidaamkii midigta fog ee soo jireenka ahaa, iyo gacansarrayntii jeebweynta ganacsatada, waana in la taagdarreeyo ururrada ay leeyihiin shaqaaluhu, waxaana culayska hawshan dib-u-dhisku uu dusha kaga dhacayaa dabaqadda hoose (shaqaalaha iyo danyarta).

Arrinkan waxaa jidgooyo ku noqday iskacaabbintii ay Faashiyiintu sameeyeen, waana aynnu ka takhalusnay oo waa aynnu ka soo afjarnay faashiyiintii daafaha caalamka, innaga oo marar badanna kaashanannay isla Faashiyiinta iyo Naasiyiinta.

Marar badan waxa aynnu u baahannay in aynnu adeegsanno gacan-kahadal iyo cunfi daran, marar kalena waxa innoo suuragashay in

aynnu adeegsanno qaabab ka qabow oo ka debecsan kuwaa hore, sida in aynnu doorashooyinka fara gelinno ama aynnu cunaqabatayn adeegsanno. (Sida saxda ahi waa in cutubkani noqdaa ka koowaad ee taariikh walba oo dagaal kadib ah la gorfeeyo, laakiin waaba dhif in la is la soo qaado)

Arrinka uu sameeyay madaxweyne Roosvelt 'Rosvelt' 1942, waxa uu noqday muunad lagaga daydo, arrinkaa oo ahaa in uu u magacaabay Admiraal Jaan Daarlana oo Faransiis ahaa guddoomiyaha guud ee waqooyiga Afrikadii Faransiisku gumeysan jiray.

Darlan waxa uu ahaa mid ka mid ah tiirarkii uu ku taagnaa iskaashigii innagala dhexeeyay Naasiyiinta, waxa uuna dejiyay xeerarka lagu qaadayo ciddii la collaytanta Yuhuudda, taas oo ay si guud u dhaqan gelisay xukuumaddii Fijii 'Vichy' (boombalihii Naasiyiinta ee nidaamkii Faransiiska).¹

Arrinkii ugu halista badnaa ee ka dhaca waddan Yurub ku yaalla oo la xoreeyay waxa uu ka dhacay Talyaaniga. Maraykanku waxa uu ku khasbay – isaga oo raacaya taladii Juurjil

¹ : Waxa uu u jeedaa in nidaamkii Faransiiska ka jiray xillagan ay Naasiyiintu maamulanayeen oo gacantooda uu ku jiray, sidii ay rabaanna ay ka yeelanayeen!

‘Churchil’ – xukuumad midigta fog ah oo kelitalis ah, oo uu madax u ahaa Faashigii Maarshaal Bodaagliyo ‘Badoglio’ iyo boqor Fiktoor Imaanwal ‘Victor Emmanuel’ kii saddexaad ee isna Faashiyiinta kaashan jiray.

Waxa ay ogaadeen qorsheeyayaasha siyaasadda Maraykanku in waxa ugu badan ee halista ku ahi uusan ahayn weerar kaga yimaadda Midowgii Soofiyeet, laakiin ay yihiin dhaqdhaqaaqyada dimuqraadiga ah ee ka soo horjeeda Faashiyada, una badan shaqaalaha iyo beeralayda, iyo sida oo kale, saamaynta ay leeyihiin xisbiyada Shuuciga ah ee hantiwadaagga ah.

Si uusan u burburin dhaqaaluhu oo aysan meesha uga bixin awooddii iyo saamayntoodii, dibna ay u soo dhisaan dhaqaalihii hantigoosiga ahaa ee dawladaha Yurub; waxa uu Maraykanku fuliyay qorshihii Maarshaal, isaga oo Yurub siiyay oo deymiyay in ka badan 12 bilyan oo Doollar, intii u dhaxeysay 1948-1951, (lacagtan saddex meeloodoow meel ayaa ay reer Yurub wax kaga soo dhoofsadeen Maraykanka sannadkii 1949).

Intii dagaalku socday dhaqdhaqaaqyadii beeralayda iyo shaqaaluhu waxa ay ku guuleysteen in ay ka adkaadaan lix kooxood oo Jarmal ahaa, xoreeyaanna waqooyiga

Talyaaniga. Markii ciidammadii Maraykanku ay soo galeen Talyaaniga waxa ay kala geeyeen oo baabi'yeen dhaqdhaqaaqyadii iskacaabbinayay Faashiyiinta, waxa ayna dib u soo celiyeen nidaamkii Faashiga ahaa ee hore.

Talyaanigu waxa uu ka mid ahaa fagaarayaashii ugu waaweynaa ee ay sirdoonka Maraykanku ka hawlgeen ilaa markii la aasaasay. Waxa ay ka baaraandegeen sirdoonka Maraykanku in Shuuciyiintu ay ku guuleystaan doorashooyinkii Talyaaniga ka dhacayay sannadkii 1948. Waxa ay dib u soo celiyeen booliskii Faashiga ahaa, waxa ay burburiyeen ururradii shaqaalaha, waxa ayna carqaladeeyeen cunnadii iyo sahaydii soo gaadhi lahayd, taas oo ay tahay haddna ma jirin hubaal ah in Shuuciyiinta la loodin karo.

Waxa uu xaddiday dokumentiga Amniga Qaranka ee koowaad sannadii 1948 (NSC 1), tallaabooyinka la qaadayo haddii Shuuciyiintu ay ku guuleystaan doorashooyinka, waxaana ka mid ahaa in faragelin ciidan la sameeyo; si loo taageero ciidammada qarsoon ee Talyaaniga jooga.

Qaarkood ayaa xiisaynayay -gaar ahaan Kaynaan— in faragelin ciidan la sameeyo inta aan doorashaduba bilaabmin, isagu maba uusan oggolayn wax isbiimayn ah, laakiin waxaa

lagu qanciyay in doorashada la faragelin karo oo sidii la doono laga yeeli karo, waana sidii dhacday.

Giriigga, ciidammadii Ingiriiska ayaa soo galay markii ay baxeen kuwii Naasiga ahaa, waxa ayna ku soo rogeen nidaam musuqmaasuq ah, arrinkan oo dhaliyay iska caabbin culus oo ay u taag waayeen Ingiriisku, markaas ayaa Maraykanku soo galay 1948, waxa uuna ka huriyay meeshii dagaal galaftay 160,000 oo qof.

Dagaalkani waxa uu ku soo gebageboobay jidhdil iyo qixinta tobannaan kun oo Giriig ah, iyo in ay galeen tobannaan kun oo kale wax aynnu ku magacawnay 'xeryaha dhaqan-celinta', iyo sida oo kale, in aynnu burburinnay ururradii iyo dhamman wax kasta oo suurogalinayay madaxbannaani siyaasadeed.

Dagaalkani waxa uu fududeeyay in maalgashadayaasha iyo hormuudka ganacsatada reer Maraykan ay gacan bir ah ku qabtaan Giriigga, halka qaar badan oo Giriig ahi ay qaxeen iyaga oo wax ay dhuunta mariyaan raadinaya, dadkii ka faa'iidayna waxaa ka mid ahaa Naasiyiintii Maraykanku kaashanayay ee uu adeegsanayay, halka ay dhibaataaduna keli ku ahayd kuwii Naasiyada la diriray ee beeralay iyo shaqaalaha kaleba isugu jiray.

Difaacitaankeennii aan jixinjixa lahayn ee aynnu dawladda Giriigga shacabkeeda ka difaacannay, waa muunadda aynnu raacnay markii aynnu Fiyetnaam ku duulaynnay. Waana waxa uu Adlaay Isteeffinsoon ‘Adlai Stevenson’ Qaramada Midoobay u faah-aahiyay sannadkii 1964.

Lataliyaayaasha Riigan waxa ay kula taliyeen in uu Ameerikada dhexe iyo meelo kaleba uu u maareeyo sidaa uu Giriigga iyo Fiyetnaam u maareeyay.

Markii ay ciidammadeennu Kuuriya galeen sannadkii 1945, waxa aynnu casilnay xukuumad lahayd shacbiyad ballaadhan oo iska dhicisay gumeystihii Jabbaan, dab iyo dagaal ayaynnu hurinnay, waxa aynnuna kaashannay qaybo ka mid ah booliskii Jabbaan ee Faashiga ahaa iyo Kuuriyiintii u shaqaynayay Jabbaan markii ay gumeysanaysay. Kuuriyada koonfureed waxa ku naf waayay boqol kun oo qof, waana intii uusan dagaalkii labada Kuuriya bilaabmin. Gobol yar oo la dhaho Jasiiradda Jijjuu ‘Cheju’ gudaheeda keliya ayaa waxa ku qudh baxay 30,000 ilaa 40,000 intii uu socday kacdoonka beeralaydu.

Afgambi Faashi ah kama dhicin Kolombiya – sidii Faraankihii Isbayn oo kale ‘Franco’ – in yar oo Maraykanka lagu muddaharaday mooyee.

Halka aysan danayn xukuumadda Maraykanku afgambigii ka dhacay Fansuweella iyo soo labakacdayntii awooddii Faashiyiinta ee Banama. Laakiin waxa jif iyo joog u diiday xukuumaddeenna (Maraykanka) in xukuumaddii u horraysay oo dimuqraadaddi ah ay ka curatay Guwaatameela (Guatemala), taas oo raacday qaabka 'heshiiska cusub' ee uu ku baaqay Roosfelt.

Sannadkii 1954, waxa ay hindiseen sirdoonka Maraykanku afgambi u beddelay Guwaatameela holac iyo naar, ilaa iyo haddana waa ku ilaaliyaan isaga oo Maraykanku joogteeya faragelinta iyo taageerada uu siiyo, gaar ahaan, xilligii Kenedi iyo Joonsoon (Kennedy and Johnson).

Qaababkii loo jebiyay ururradii iskacaabbinayay Faashiyiinta waxaa ka mid ahaa in la ciidameeyo dambiilayaal dagaal, sida Kalaaws Baarbi 'Klaus Barbie' hoggaamiyihii Gestaabada Liyoon 'Gestapo'² kaas oo falalkii uu geysanayey ku mutaystay naanaysta ah dhiigyacabkii Liyoon, markii dambena Maraykanka uu u magacaabay basaase uga shaqeeya Faransiiska.

² : Gestaabo: waa mid ka mid ah waaxihii amniga ee Naasiyiintii Jarmalka kuwoodii ugu qarsoodiga badnaa, sidoo kalena fulin jiray hawlo madaxjabin, dil iyo burburinba isugu jira.

Baarbi markii lagu soo celiyay dalkiisii Faransiiska si loogu maxkamadeeyo dambiyo dagaal sannadkii 1982, waxaa difaacay kornaylkii ka fadhiistay sirdoonka ciidammada Maraykanka ee Oogan Koolb 'Eugene Kolb' isaga oo yidhi: "Aad ayaannu ugu baahnayn xirfadaha Baarbi, dhiifoonaaantiisiina waxa aannu ku jihatnayn kahortagga dhaqdhaqaaqyadii iskacaabbineed iyo xisbigii Shuuciga ahaa ee Faransiiska, iyada oo amintaa ay xoreeyayaashii Maraykanku cadaadis kala kulmeen.

Haddii Maraykanku soo xero geshanayo kuwii nidaamkii Naasiga ahaa ka tegay, waa maangal in ay ciidameeyaan kuwa ku takhasusay cabudhinta iyo soo afjaridda dhaqdhaqaaqyada wax-iskacaabbinta.

Intaa wixii ka dambeeyay, markii ay adkaatay ilaalinta danbiilayaashaas lagu dheefay ee Yurub jooga, waxa ay si qarsoodi ah ugu dhoofeen Maraykanka iyo Laatiin Ameerika, badankana waxaa ka caawin jiray Faatikaanka iyo baadariyayaashii Faashiyiinta ahaa.

Danbiilayaashaasi hadda waxa ay lataliyayaal ka yihiin dawladaha booliisiga ah ee Maraykanku ka dhisay Laatiin Ameerika, ee la nooca ah nidaamkii Naasiga ahaa.

Sida oo kale, danbiilayaashaasi waxa ay noqdeen hormuudka kaganacsiga daroogada iyo

hubka, waxa ayna dadka Laatiin Ameerika u horseedeen tabaha ciqaabta iyo jidh dilka.

Badhkood Ameerikada dhexe ayaa ay aadeen si ay u noqdaan birijka isku xidha xeryihii geerida ee Yurub iyo kooxihii geerida ee Ameerikada dhexe, arrinkaa oo ku dhacay taageerada Maraykanka iyo iskaashiga isaga iyo Naasiyiinta dhex maray dagaalkii labaad ee adduunka kadib.

Uheellanaanta Dimuqraadiyadda

Cilmibaadhistii iyo diraasooyinkii heerkoodu sarreeyay ee ay soo saarayeen qorsheeyayaasha siyaasadda Maraykanku, waxa ay midba midda ku xigtaa tibaaxaysay in halista ugu weyn ee ku soo fool leh nidaamka caalamka cusub ee Maraykanku hoggaaminayo ay ka imaanayso dhanka waddaniyiinta caalamka saddexaad iyo nidaamyadooda waddaniga ah. Waa kuwa mararka qaar lagu magacaabo xagjiriinta waddaniyadda, iyaga oo u heellan buuxinta baahiyaha shacabkooda, gaar ahaan, kor-uqaadidda maciishadda iyo ka haqabtirka baahiyaha lagama-maarmaanka ah.

Qorsheeyayaasha siyaasadda Maraykanku waxa ay ku soo celceliyaan oo boorriyaan in laga hor tago waddaniyiintu in ay xilka madaxtinnimada qabtaan, haddii ay si uun xilkaa ku gaadhaanna, waxa lamahuraan noqonaysa in la casilo oo lagu beddelo xukuumado kale oo doorbidaya maalgashiga raasamaal gaar ah oo gudaha ama dibaadda ah, waxsoosaarkana u jihatay dhanka dhoofinta. Sida oo kale, faa'iidada u dhoofinaya dibadda (ma jiro hal dokumenti oo sir ah oo ka horyimi hadafyadan, haddiiba aad ka mid tahay qorsheeyayaasha siyaasadda Maraykanka

hadafyadani waxa ay kaaga dhigan yihiin hawada aad neefsanayso ee aad ku nooshahay).

Ma jirto dawladahan dhibbanaha ah mid ka mid ah oo diidday Dimuqraadiyadda ama dib-uhabaynta bulshada, marka laga reebo tiro yar oo danahoodu Maraykanka ku xidhanyahay mooyee.

Maraykanku waxa uu filanayaa in uu huri waayayo adeegsiga awoodda, waxa uuna gaashaanbuursanayaa maamullada millateriga ah (kooxaha siyaasiga ah ee Laatiin Ameerika ee ugu collaytanka yar Maraykanka), sida ay caddeeyeen qorsheeyayaashii Kenedi. Sidaa darteed, waxaa u fudud soo-afjarka koox kasta oo waddani ah oo faraha ka baxda.

Taa ugama jeedno in Maraykanku uusan u tudhin danyarta. Tusaale ahaan, dalka Koostariika ‘Costa Rica’ badhtamihii kontameeyadii, waxa uu faray safiirkii Maraykanku, shirkadda furuutka ee Maraykanka ee maamuli jirtay Koostariika, in ay xoogaa yar oo faa’iidada ka mid ah u tuuraan si ay dareenkooda u dejiyaan oo raad weyn oo nafsii ah u gala tagaan.

Arrinkaa waxa ku waafaqay Wasiirkii Arrimaha Dibadda Joon Foostar Daalaas ‘John Foster Dulles,’ waxa uuna u sheegay madaxweynaha Maraykanka Aysinhaawar

‘Eisenhower’ si aysan Laatiin Ameerika gacantiisa uga bixin: “Xoogaa madaxsalaax ah sii; si ay u moodaan in aad jeceshahay.”

Haddaba wixii la soo dhaafay innaga oo ka duuleyna, waxa aynnu si fudud u fahmi karnaa siyaasadda Maraykanka ee ka dhanka ah caalamka saddexaad. Innagu waxa aynnu diidayinnaa, si aan ka soowaabasho lahayn, Dimuqraadiyadda, haddii waxa ka dhalanaya aynnaan xakamayn karin, dhibtuna waxa weeye in Dimuqraadiyadda dhabta ahi ay dabin ugu dhacayso munaafaqadda odhanaysa waa in xukuumaduhu ay haqabtiraan baahiyaha shacabkooda, intii ay haqabtirilahaayeen danaha maalgashadayaasha reer Maraykan.

Mac’hadka Boqortooyada ee Arrimaha Dawliga ah ee Landhan waxa uu faafiyay diraaso ku saabsan nidaamka xidhiidhadda Maraykanka ee dawliga ah. Waxa soo baxay in mar kasta oo Maraykanku Dimuqraadiyadda afka ka taageero uu isuxilqaamo fulinta mashaariicdiisa raasamaaliga ah ee gaarka ah. Mar kasta oo maalgashadayaasha reer Maraykan halis soo food saarto waa in Dimuqraadiyadda gaashaanka loo daruuraa, booskeedana lagu beddelaa dil iyo ciqaab.

Maraykanku waxa uu taageeray hor-Istaagidda xukuumado baarlamaani ahaa,

waxana ka mid ahaa: Iiraan 1953, Guwaatameela 1954. Kenedi waxa uu taageeray sannadkii 1963, afgenbi millateri oo lagu horistaagay Dimuqraadiyadda, sannadihii 1963 1965' Doomininkaan 'Dominican Republic,' Baraasiil 1963, Jili 'Chile' 1973, iyo meelo kale oo badan.

Siyaasadeheenna ku aaddan dawlado badan iyo wixii aan ka samaynnay Salfadoor 'Salvador' waa isku mid. Qaababkaa aynnu adeegsannay ma fiicnayn. Ciidammadii aynnu u dirnay Niikaraagwa 'Nicaragua' iyo wakiilladeennii argagixisada ahaa ma ahayn shaqadoodu keliya dil, laakiin waxa u dheeraa bahalnimo, naxariisdarro iyo jidh-dil Saadi³ ah—in dumarka naasaha laga jaro, lugaha la isugu xidho, jidhkoodana la jeexjeexo oo ay dhiig baxaan ilaa inta ay ka qudh baxayaan, dadka madaxyada laga gooyo laguna xidho tiirar. Dulucdu waa in la baabi'yo waddaniyadda raacdaynaysa madaxbannaanida, taas oo keeni karta Dimuqraadiyadda dhabta ah.

³ : Sadistic ama Sadism, waa macaansiga dhibaataaynta iyo waxyeellaynta cid kale.

Halista Tusaalaha Wacan

Ma jiro dal aan cabsidan laga qabin. Dawladdu ha ahaato mid aan muhimad lahayn ama mid hodan ah ama mid xooggan. Dhab ahaan, kuwa ugu faqiirsan ayaaba ugu halis badan.

Tusaale ahaan u qaado Laaws 'Laos' 1960, waxa laga yaabaa in aysan jirin dawlad ka faqiirsanayd, xitaa dadka deggani qaar badan oo ka mid ahi uma warhayn in ay jirto dawlad lagu magcaabo 'Laaws.' Waxa keliya oo ay ogaayeen in ay deggan yihiin tuulo, tuulooyin kale oo ay is ku dad yihiinna ay deris yihiin. Laakiin isla markii ay bilaabeen qaarkood dib-u-habayn bulsho oo aad u hooseysa waxa ay ka war heleen Maraykanka oo duqaynaya oo dhulka la simay, wax xidhiidh ahna lama aysan lahayn dagaalkii Fiyetnaam ka socday.

Girinaada 'Grenada' waa waddan aad u yar, khariiraddana in aad ka heshaa ay adag tahay. Waxa deggan boqol kun oo soo saara lawska, markii ay bilaabeenba dib-u-habayn bulsho waxa burburiyay Maraykanka.

Laga soo bilaabo kacdoonkii Balshafiga ahaa 1917, waxa marmarsiinyo looga dhigaa weerar kasta oo Maraykanku qaado in la iska difaacayo Shuuciyadda.

Sidaa darteed, markii Maraykanku ku duulay Girinaada 'Grenada' 1983, taliyaha ciidammadu waxa uu sheegay, haddii Yurub uu soo weeraro Soofiyeetku in ay Girinaada tahay caqabad innaga hor istaagaysa in uu shidaalku xulufadeenna u maro badda Kaarbiyaanka, iyaga oo noqonaya kuwo go'doonsan oo aynnaan difaacistooda awoodi karayn.

Hadadlkan qosolka ahi waxa uu ku guuleystay in uu kiciyo xamaasadda shacabka; si ay xadgudbkaa aragagixisnimada ah u taageeraan.

Niikaraagwa iyada waxaa loo weeraray in haddii aan la iska qaban ay innaga soo geli doonaan xuduudda Haarlingan 'Harlingen, Texas', oo ah masaafo aad u gaaban oo aan qaadanayn wax ka badan laba maalmood oo gaadhi ah.

Waxay ku sigteen Niikaraagwa iyo Salfadoor in ay baaba'aan oo aan midh ka hadhin, cidna ma aysan dhaaddeen. Labadooduba waxa ay kala kulmeen Maraykanka duqeyn iyo garaacid aad u daran, taas oo ay ku qudh baxeen boqollaal kun oo qof iyo balaayiin Doollar.

Waxaa jira sabab arrinkaas ka dambeysa, oo mar kasta oo dawladdu taag iyo tamar darantahay, waa mar kasta oo ay sii korodho halista ah in ay noqoto tusaale. Haddii ay

awooddo dawlad taag daran oo faqiir ah sida Girinaada in ay hormarto iyada oo aan Maraykan gacantiisa ku hoos jirin, maxaa aysan dawlada ka kalaba u hormari karin?

Arrinkani waxa uu ku dhaboobayaa dawlada Indooniya (Fiyetnaam, Kamboodiya, Laaws, Mayanmaar) bal iyagaaba leh khayraat iyo ila dhaqaale oo waaweyn. In kasta oo Aysanhaawar iyo la taliyayaashiisu ay aad uga hadleen bariiska, daasada, iyo cinjirka, se waxa ay dhab ahaan uga cabsanayeen in shucuubtaasi ay hormaraan oo madaxbannaanaadaan, oo ay dhaqaalahooda caymiyaan, caddaaladna helaan. Shacabka reer Taylaan ayaa iyana odhan lahaa: annaguba maannu samaynno? Haddana Mallaysiya ayaa iyana odhan lahayd: annaba maannu samaynno? Haddana Indooniya ..., dabadeed, Maraykanku waxa uu waayi lahaa 'Geyigii weynaa.'

Haddii aad doonaysid nidaam caalami ah oo u hoggaansan baahiyaha maalgashadayaasha reer Maraykan, waa in aadan oggolaan in gaballo yaryar ay nidaamka ka tallaabaan. Dokumentiyada qaar waxa ay u caddeeyeen qaab yaab leh oo waxa ayba bannaanka u keeneen si cad.

Jili ‘Chili’ waa dal weyn oo hodon ku ah kheyraad dabiici ah, laakiin haddii Jili madaxbannaanaato Maraykanku ma burburayo. Haddaba, muxuu Maraykanku danaynta intaa le’eg Jili u siinayaa? Sida waafaqsan hawraartii uu yidhi Kisinjer ‘Kissinger: “Jili waa feeras u gudbaya gobolka intiisa kale oo saamayntiisu gaadhayso ilaa Talyaaniga.”

Iyada oo ay jirto in ay 40 sano ka soo wareegtay faragelintii Maraykanka ee Talyaaniga, haddana weli dhaqdhaqaaqyo isaga u shaqeeya ayaa uu ku leeyahay. Haddii xukuumad dimuqraaddi ah ay Jili ka hirgasho oo guul soo hoyso, waxa ay garwaaqsanayaan codbixiyayaasha Talyaanigu gefkooda, afkaar cusub oo ku saabsan xukunkooda iyo soo noolaynta dhaqdhaqaaqyadii ay wiiqeen sirtoonka Maraykanku afartameeyadii ayaaba ku dhalan kara, dabadeedna, dadaalladii sirtoonka Maraykanku ay afartankii sano ee u dambeeyay bixiyeen ayaa hal bacad lagu lisay noqonaya.

Qorsheeyayaasha siyaasadda Maraykanku waxa ay ka digeen laga soo bilaabo xilligii Wasiirkii Arrimaha Dibadda ee Diin Ajisoon dhammaadkii afartameeyadii iyo ilaa maanta, in hal tufaax uu qudhmin karo sanduuq dhan,

markaa dib-u-habaynta bulsheed iyo ta dhaqaalaba waa wax adduunka ku faafi kara.

Aragtidan waxa ay u bixiyeen: “Aragtida tufaaxa qudhmay.” Waxa ay dadweynaha ku cabsi geliyeen in Hoo Jii Miin ‘Ho Chi Minh’ uu badda soo jeexi doono isaga iyo ciidankiisa reer Fiyetnaam oo ay soo dul joogsan doonaan xeebaha Kalafoorniya. Hoggaamiyayaasha Maraykanka qaarkood ayaa ku qanci kara khuraafaatkan, laakiin qorsheeyayaasha dhugta leh waxa ay og yihiin in halista dhabta ah ay tahay ‘tusaalaha wanaagsan.’

Mararka qaar si aan madmadow lahayn ayaa qodobkan loo caddeeyaa. Xukuumadda Maraykanku markii ay qorshaynaysay afgembintii Dimuqraadiyaddii Guwaatameela sannadkii 1954, waxa uu tibaaxay masuul ka tirsanaa Wasaaradda Arrimaha Dibadda in Guwaatameela ay noqotay halis isa soo tartay oo khalkhal gelinaysa degganaanshaha Honduraas iyo Salfadoor. Dib-u-habaynta beeraha ee ay waddaa waa hub borobogaando ah oo khatar ah, waxa uuna u badan yahay barnaamijkeedu daryeelka bulshada, isaga oo lid ku ah dabaqadaha sare iyo maalgashatada ajaanibta ah iyo deriskooda Ameerikada dhexe.

Maraykanka waxa muhiim u ah cayminta iyo dejinta dabaqadaha sare iyo maalgashatada

ajaanibta ah, guul bulsheed iyo mid dhaqaale oo aan labadaa qolo ka hoos dhalanayn waxa ay halis ku tahay Maraykanka, waxaana lamahuraan ah in laga takhalluso inta uusan cid kale u gudbin. Sababtan darteed, ayaa dawladda ugu faqiirsan uguna taagta daran ay u tahay tusaalaha wanaagsan ee ugu khatarta badan haddii ay hormar gaadho, sidaa darteed, waa in la burburiyaa.

Caalamka Saddex Xagalka ah

Caalamku waxa uu bilowgii toddobaatameeyadii, dhaqaale ahaan, u qaybsamay saddex kooxood:

Kooxda 1aad: Waxaa saldhig u ah Jabbaan iyo meelihii ay gumaysan jirtey. Jabbaan soddomeeyadii iyo afartameeyadii waxa ay ku baaqday barwaaqa-sooran ay wadaagaan bariga Aasiya. Dagaal ayaana ka dhex qarxay iyada iyo Maraykanka; illeyn waxa ay hunguraysay in ay isku fidiso bariga Aasiya, is la qaabka uu isugu fidiyay reer galbeedku caalamka intiisa kale. Laakiin dagaalkii labaad ee adduunka kadib, waxaa dib loo qaabeeyay gobolka, dhibna kuma aynnaan qabin haddii ay ka faa'iidayso Jabbaan, laakiin waa in ay u martaa jidkii aynnu ugu talo galnay.

Naac badan baa la qoraa oo ku saabsan sida milgaha ku dheehan ee aynnu uga qayb qaadannay dib-u-dhiska Jabbaan ilaa ay awoodday in ay innala tartanto. Waxaase xaqiiqadu tahay in laba mid uun aynnu kala dooran lahayn: in aynnu Jabbaan iyo Aasiyaba faraha ka qaadno, iyagu ha u madaxbannaanaadaan sida ay isu maaraynayaan, taas oo ka dhigan in aynnu yaraynnay 'geyigii weynaa.'

Iyo in aynnu Jabbaan dib-u-dhisno iyaga oo hoos jooga maamulkeenna, waxa aynnuna doorannay qodobka labaad.

Dagaalkii labaad ee adduunka kadib, cidna is ma lahayn Jabbaan ayaa Maraykanka la tartami karta maalin maalmaha ka mid ah (in kasta oo malahani uusan cunsuriyad ka madhnayn). Waxaa qayb weyn ka qaatay dib-u-soo-kabashadii Jabbaan dagaalladii Kuuriyooyinka iyo Fiyetnaam.

Tiro yar oo ka mid ah qorsheeyayashii siyaasadda Maraykanka ee dagaalkii labaad ee adduunka kadib ayaa lahaa fiiro dhumuc weyn, waxa ka mid ahaa Jooj Kaynaan. Kaynaan waxa uu soo jeediyay in Maraykanku taageero warshadaynta Jabbaan, laakiin shardi ayuu ku xidhay: waa in Maraykanku xakameeyo shidaalka Jabbaan helayso, arrinkan oo Maraykanka u oggolaanaya adeegsiga awoodda Fiito (Veto Power) haddii ay Jabbaan xadka dhaafto. Maraykanku soojeedintan waa uu qaatay, Jabbaanna waxa ay ahayd ilaa dhammaadkii toddobaatameeyadii mid taag daran, in yar oo 10% oo shidaalkeeda ah mooyee.

Sababtani waa ta uu Maraykanku u daneeyo shidaalka Bariga Dhexe. Uma baahnin shidaalka Bariga Dhexe si aan shidaal u helno,

laakiin waxa aan doonaynnaa in aan gacanta ku dhigno ilaha tamarta ee adduunka, aynnuna hubsanno in faa'iidadu innagu soo burqanayso innaga iyo Ingiriiska, waana mid ka mid ah sababaha aynnu saldhigyo ciidan ugu leennahay Filibiin, iyadu waxa ay qayb ka tahay nidaamka faragelinta ee aynnu caalamkan ka hirgalinnay.

Kooxda 2aad: Waa Yurubta Jarmalku ka taliyo.

Yurub tallaabo ayaa ay horay u qaadday markii ay samaysay suuq la wadaago, waxa ayna leedahay dhaqaale ka badan ka Maraykanka, dad ka badan kuwa dega Maraykanka, waxbarasho ahaanna iyadaa fiican.

Haddii ay Yurub noqoto awood keli ah, Maraykanku waxa uu ku soo dhacayaa kaalinta labaad. Waana wax dhici kara haddii Jarmalku hoggaamiyo ol'olaha ku-soocelinta Yurubta bari kaalinteedii ahayd in ay lahaystayaal u noqoto Yurubta galbeed. Macnaha, qayb cusub oo caalamka saddexaad ka mid ah.

Kooxda 3aad: Waa Maraykanka iyo Kanada.

Waxaa kale oo dhawaan ku soo biiraya Meksiko iyo kalabadh dhulka qaybtiisa galbeed, iyada oo loo marayo heshiisyada xorta ah ee mudnaanta siinaya danaha maalgashadayaasha Ameerikaanka ah.

Mar kasta waxa ay innala tahay in Laatiin Ameerika ay tahay wax aynnu leennahay, sidii uu ku sheegay Heneri Istiimsoon ‘Henry Stimson’— wasiirkii difaaca ee xukuumaddii Faraaaklin Dii Roosefelti iyo tii Taaft ‘Taft’, iyo Wasiirkii Arrimaha Dibadda ee xukuumaddii Hoofar ‘Hoover—: “Gobolkeenna yar ee aan dhibta lahayn.” Waxa uu u jeeday in kooxda Doollarku ay sii waddo joogtaynta ka horistaagidda Laatiin Ameerika iyo Kaarbiyaankaba in ay gaadhaan hormar ay madaxbannaanidooda ku keensadeen.

Haddii aadan fahmim loollanka aynnu kula jirno dawladaha warshadleyda iyo kuwa caalamka saddexaad, waxa siyaasadda Maraykanku kuula muuqanaysaa sidii silsilad gefaf iyo isburinno miidhan ah oo aan qorshe ku dhisnayn. Laakiin, dhab ahaantii, hoggaamiyayaasheennu waa ay ku guuleysteen hawlihii loo xil saaray, intii karaankooda ahayd.

Burburinta Bannaanka ah

(Dawladaha oo dibadda laga dumiyo)

Siyaasadda Deriskeenna Wanaagsan

Ilaa intee in le'eg ayaa aynnu raacnay fikraddii Jooj Kaynaan? Ilaa intee ayaa aynnu meel is ka dhignay hadalkii aan caddayn iyo hadafyadii aan dhabta ahayn sida: xuquuqul insaanka, kor-uqaadista maciishadda, u-digarogashada Dimuqraadiyadda? Waxa aynnu ka soo hadalnay sidii aynnu isugu xilqaannay Dimuqraadiyadda Laatiin Ameerika, laakiin ka warran arrimaha kale?

Aynnu diiradda saarno Laatiin Ameerika, aynnuna ka bilowno xuquuqul insaanka, cilmibaadhis uu sameeyay akaademiga weyn ee ku takhasusay xuquuqul insaanka Laaris Shooltas 'Lars Schoultz' waxa ay caddaysay: "In kaalmooyinka Maraykanku bixiyaa badankoodu u janjeedhaan dhanka dawlada shacabkooda jidh-dilka iyo ciqaabta ku haya, xidhiidhna lama laha (kaalmooyinkaas badintoodu ama dhimistoodu) baahida dalka, laakiin waxa keli ah ee ay ku xidhan tahay waa u-adeegidda danaha maalgashadayaasha.

Cilmibaadhis uu sameeyay dhaqaalayahanka Edwaadh Haarman 'Edward Herman' waxa ay daaha ka qaadday iskusidkanaanta ka dhexaysa jidh-dilka iyo kaalmooyinka Maraykanka ee caalamka oo dhan. Cilmibaadhistani waxa kale oo ay innoo bidhaamisay macnaha arrinkan:

labadan arrin waa ay is ku xidhan yihiin (kaalmada Maraykanka iyo cadaadinta iyo jidhdilka shacabku); si loo sameeyo jawi ku habboon danaha gaarka ah.

Bal ka warran kor-u-qaadista nololmaalmeedka? Waa arrinka uu ku baaqay Kenedi isaga oo ku lammaaninaya horumarka, sida aan filayo.

Kobcintii iyo hormarintii waxaa loo weeciyey dhanka danaha maalgashatada Maraykanka, kobcintan iyo hormarintani waxa ay ballaadhisay oo dhidibbada u taagtay nidaamka ku shaqeeya soosaarka waxyaabaha loo baahan yahay in la dhoofiyo, iyada oo hoos u dhig weyn lagu sameeyay waxyaabihii gudaha looga baahnaa.

Caadi ahaan, muunadda ah: “Wax ha la beerto si wax loo dhoofiyo,” waxa ay keentaa dhaqaale weyn oo mucjiso ah, waxaana kor u kaca waxsoosaarka qaranka isaga oo shacabkiina gaajoonayo! Marka shucuubta ay soo marto mucjiso dhaqaale oo gaag-mareebto ah, waxa abuurma mucaarad, waxa keliya ee lagu xalliyaana waa cabudhin, cadaadin, dil, iyo argagaxgelin.

(Qofnimadeennu waxa ay qabatintay cunfiga iyo argagixisannimada, sannadkii 1818, waxa uu bogaadiyay madaxwene Joon Aadmis guushii

ka dhalatay argagixinta markii lala dagaallamayay Hindida iyo madowgii fallaagada ahaa. Waxa la qoray si loogu qiil dayo cadhadii madaxweyne Androow Jaagsoon ‘Andrew Jackson’ kula duldhaacay dadka reer Falorida ee uu ku cidhibtiray dadkii deegaanka ahaa, gobolkii Isbaanishka ahaana hoos geeyey maamulka Maraykanka, arrinkan oo ay ka meersadeen Toomas Jefersoon ‘Thomas Jefferson’ iyo kuwo kale, ayna ka dhigteen tusaale fiican).

Tallaabada ugu horraysaa waa adeegsiga booliska, isaga oo boolisku awood u leh ka-warhelka tabashada markiibana cidhibtiraya, inta uusan arrinku weynaana oo uusan “dhaawac weyn” Keensan. Waa magaca dokumentiga qorshayntu u bixiyaye.

Haddii aynnu huri weyno dhaawaca weyn, waxa aynnu adeegsanaynnaa ciidanka. Haddii ciidanku waxba tari waayana xukuumadda ayaa aynnu ka takhallusaynnaa.

Dawladdii isku dayda horumar madax bannaan oo ku salaysan waddaniyad, sida Guwaatameela, inta ay talada hayaan xukuumadaha hantigoosadka dimuqraadiga ah ee Aarifaalo ‘Arévalo’, Aarbenis ‘Arbenz’, iyo xukumadda Boosh ‘Bosch’ ee Jamhuuriyadda

Dominikaan waxa ay waajahaysaa colaad iyo cunfi uga yimaadda Maraykanka.

Tallaabada labaad waa adeegsiga Millateriga, Maraykanku waxa uu ka shaqeeyay sidii uu xidhiidh ula yeelan lahaa millateriga dawladaha ajnabiga ah, illey iyaga ayaa ah waddada loo marayo afgembinta dawladdii safka ka baxdee. Sidaa ayaana lagu saleeyay afgembigii Jili ka dhacay 1973, iyo Induniisiya 1965.

Afgembiyadaa ka hor, waa aynnu necbayn xukuumadda Jili iyo Induniisiya, laakiin xidhiidhkii aynnu la lahayn waa uu sii socday, hubna waa u diri jirnay, waxa aynnuna xidhiidho la samaynnay saraakiishii ciidan, iyaga ayaana dartaa xukuumadda u ridaya.

Waa isla sababta hubka Maraykanku ugu burqanayay Iiraan bilowgii siddeetamaadkii isaga oo Israa'iil u sii marayay, sida laga soo xigtay saraakiisha sare ee Israa'iil ee ku lug lahaa, waana dhacdooyin si fiican loo garanayo 1982.

Intii uu madaxweynaha ahaa 'Kennedy' shaqada millateriga ee Laatiin Ameerika waxa ay iska beddeshay ilaalinta "kalabadh dhulka qaybtiisa galbeed" waxa ayna isu beddeshay ilaalinta amniga qaran, taas oo ka dhigan dagaal ka dhan ah shucuubta Laatiin Ameerika. Arrinkan waxa uu dhaliyay in Maraykanku

faraha la galo hawlo la mid ah kuwii ciidamada gumaadka ee Himler⁴ ay qaban jireen.

Maamulkii Kenedi waxa uu qabanqaabiyey afgentbigii millateri ee Baraasiil ka dhacay 1964, waxa uuna taageeray burburintii Dimuqraadiyaddii Baraasiil, taas oo ahayd mid cagta saartay dhabbadii madaxbannaanida.

Maraykanku waxa uu taageeray afgentbiyo ku salaysnaa jidh-dil iyo argagaxgelin oo tabtii Naasiyiinta oo kale ah. Arjantiin, Jili, iyo dalal kale ayaa soo maray xilliyo dhiiggu mulucyeeyey oo lixdameeyihii iyo siddeetamaadkii ku beegnaa.

Dhanka qaanuunka iyo sharciga haddii laga eego, waxaa la helayaa caddaymo badan oo ku filan in dambiyo dagaal lagu soo oogo dhammaan madaxdii Maraykanka soo martay, laga soo bilaabo dagaalkii adduunka kadib, ama ugu yaraan in ay ku lug lahaayeen dembiyo dagaal oo halis badan.

Millaterigu waxa ay markiiba abuuraan masiibo dhaqaale iyaga oo raacaya talada lataliyayaasha Maraykanka ah, marka ay

⁴ : Haaynrish Himler (Heinrich Himmler) waxa uu ka mid ahaa hoggaamiyayaashii ciidammada gaarka ah ee Naasiga ahaa, waxa uuna ku lug lahaa xasuuqyo badan oo Holokowsku ka mid ahaa.

arrinkaa ka faraxashaanna waxa eedda la saaraa dadka rayidka ah.

Gumeysiga ciidan ee qayaxan maaha lagamamaarmaan, waxa soo baxay habab casri ah, sida: sanduuqa lacagta adduunka, iyo bankiga adduunka.

Bankiga adduunku waxa uu wax ku deymiyaa siyaasadda loo yaqaan “xoreynta dhaqaalaha”, oo la macne ah u-diyaarinta dhaqaalaha waddankaa in dhaqaalaha shisheeyuhu maansheeyo, oo uu maamulo, iyada oo aad hoos loogu dhigayo u-adeegidda bulshada. Bulshaduna waxa ay u qaybsantaa tiro yar oo hantiillayaal ah iyo tiro badan oo sabool ah.

Deynta iyo habqanka dhaqaale ee ay sameeyaan maamullada millateriga ahi waxa ay gogolxaadh u noqdaan shuruudaha iyo qodobbada uu sanduuqa lacagta adduunku ku xidhi doono, se haddii ay awoodo siyaasadeed oo waddani ah doonaan isbeddel, markan oo kale millaterigu waxa uu ku dhaqaaqaa dib-usoocelinta degganaanshaha!

Xaaladda Baraasiil ayaa ah mid wax inna baraysa. Baraasiil waa dal leh kheyraad dabiici ah oo ka dhigi kara dawladda carra-edeg ugu hodansan. Waxa kale oo ay lahayd koboc warshadeed oo heer sare ah. Laakiin afgembigii dhacay 1964, dartii iyo mucjisada dhaqaale ee la

wada dhawrayay darteed ayaa keentay in Baraasiiliyaanku u noolaadaan sida Itoobiyaanka, iyo heer ka hooseeya dadka dega Yurubta bari. Kaba imow jidh-dilka, laynta iyo hababka kale ee loo xakameeyo tirada dadka!

Warbixinno ayaa sheegaya in miisaaniyadda wasaaradda waxbarashada ee Baraasiil badankeedu lagu bixiyo quudinta ardayda, illeyn badankoodu maba helaan wax ay cunaan intaa yar ee bilaashka ah mooyee. Sida ay xustay majalladda 'koonfurta,' Baraasiil carruurta ku qudh baxda ayaa ka badan Sirilaanka. Dadka deggan saddex meeloodoow meel baa diillinta faqriga ka hooseeya. Toddobo malyan oo carruur ah oo la dayacay ayaa dawarsanaya, wax xadaya, xabagna ka uruursanaya waddooyinka. Malaayiin ayaa deggan buulal digada ah oo ku yaal xaafado aan waxba haysan, ama hoos seexanaya buundooyinka. Taasi waa Baraasiil! Waa mid ka mid ah waddammada ugu hodonsan khayraadka dabiiciga ah.

Waxaa xaalad tan u eg ka dhacday dhammaan Laatiin Ameerika. Ameerikada dhexe dadka lagu dilay taageerada Maraykan laga helayo waxa ay gaadhaan 200,000.

Waxaqabadyadaasi ayaa Maraykanka ka dhigay mid u qalma naanaysta ah: "Horseedka Dimuqraadiyadda", sida ayba ugu magacaabeen

joornaallada Leebraaliga ahi “Jumhuuriyaddii Cusbayd”. Toom Woolf ‘Tom Wolf’ waxa uu ka warramay: “in siddeetameeyadii ay ahayd xilligii bini’aadntinnimadu heerkeeda ugu sarraaysay ay maraysay.” Istaalin baa waxa uu odhan jiray: “Guushii waa na dawakhisay.”

Deldelaaddii Salfadoor

Salfadoor Waxa ay sannado badan la daalaadhacaysay cabudhin, jidh-dil, iyo layn ay kala kulmaysay diktaytarradii u kala dambeeyay ee aynnu xukunka u dhiibannay innaga oo taagerayna, waana arrinka aan cidna kala jeclayn.

Dhammaadkii toddobaatameeyadii, waxa xukuumaddii Maraykanku bilawday in laba arrin la daneeyo:

koow: Gabaabsiga ku yimi awooddii Soomoosa ‘Somoza’ ee Maraykanku ku waayi karo saldhiggii uu gobolka ka maamuli jiray.

Laba: Halistan ayaana ka khatarsan tii hore. Waxaa bilowmay in saamiga ururrada shacbiga ah ay ku leeyihiin xukuumadda Salfadoor toddobaatameeyidii uu kor u kac sameeyo: ururrada beeraleyda, iskaashatooyinka, kooxo iyo ururro kaniisadeed u xuub siibtay ka shaqaynta arrimaha bulshada iwm. Arrinkani waxa uu khatar geliyay Dimuqraadiyadda!

Bisha labaad ee sannadka 1980, madixii baadariyaasha Salfadoor Oskaar Roomeero ‘Oscar Romero’ waxa uu dhanbaal u diray madaxweynihii Kaartar ‘Carter’ isaga oo ka tuugaya in uusan kaalmooyin ciidan u soo dirin Juuntada dalka xukunta, isaga oo caddeeyay in

kaalmooyinkaasi ay xoojinayaan gaboodfalka iyo cabudhinta ay xukuumadda Juunta ku hayso ururrada shacbiga ah, ururradaa oo ahaa kuwa u halgamaya in la tixgeliyo baahiyaha asaasiga ah ee dadka (waana arrin aan Waashintoon ugub ku ahayn, umana baahnin in aynnu sheegnaba).

Isbuucyo kadib, waxa si qarsoodi ah loo dilay madaxii baadariyaasha Oskaar, intii lagu gudo jiray Quddaaska.⁵

Waxa loo malaynayaa in Naasigii cusbaa ee Roobeerto Dii Awbisoon 'Roberto d'Aubuisson' uu ka dambeeyey falkaa iyo falal kale oo badan.

Awbisoon waxa uu ahaa hoggaamiye intii uu noolaaba hoggaaminayay xisbigii 'ARENA' ee Salfadoor ka talin jiray.

Dhammaan xubnaha xisbiga ARENA waxaa waajib ku ahaa iyaga oo uu xataa ka mid ahaa Alfareedo Kiristaani 'Alfredo Cristiani' in ay dhiig ugu dhaartaan in ay daacad u ahaan doonaan Naasiga cusub ee Awbisoon.

Waxa la abaabulay cibaado wadareed lagu xusayo sannad guuradii tobnaad ee ka soo wareegtay dilkii madaxii baadariyaasha ee Oskaar, waxaana ka soo qayb galay beeralay, danyar, iyo baadariyayaal badan oo shisheeye

⁵ : Cibaado ay Kiristanku sameeyaan.

ah, waxaana la wada dareemayey maqnaanshiiyaha Maraykanka. Kaniisadda Salfadoorna waxa ay ka codsatay Faatikaanka in ay ka dhigaan Qiddiis.⁶

Arrimahan oo dhan waxa ay dhaceen (dhaqdhaqaaqyadii Roomeero ee xuquuqda aadanaha, dilkiisii, cibaada wadareeddii xuskiisa loo abaabulay, iyo codsigii kiniisadda Salfadoorna) iyada oo aan warbaahintu soo hadal qaadin, xataa Niyoo Yook Taymis ma soo hadal qaadin, wargeyska Diiwaankuna waxba ma qorin, xataa kama hadal dilkii qarsoodiga ahaa ee ay fuliyeen rag Maraykanku soo tababaray oo maalgeliyay.

7, Maaris sannadkii 1980, ka hor dilkii baadariga laba asbuuc, dagaal ayaa ka huray Salfadoor u dhexeeya shacabka iyo xukuumadda (Maraykankuna soo fara geliyay oo taageeray). Weerarkii ugu cuslaa waxa uu ka dhacay Rio Sumpul, isgarabsi u dhexeeyay ciidanka Salfadoor iyo kuwa Honduraas ayaa geystay gawricidda 600 oo muwaadiniin ah. Jidhkii carruurta ayaa ay gabal-gabal u jar jareen, dumarkii ayaa ay jidh dileen oo hafiyeen. Ayaamo kadib xasuuqaa ayaa marba la helayey

⁶ : Qiddiisku kiristanka agtooda waa qofka awaamirta Alle fartooma ee wanaagga la god gala, kolka uu dhintana waxa uu ka mid noqdaa hormuudka diinta.

qaybo ka mid ah dad la diley. Xasuuqaan waxaa ogaa kormeerayaal kaniisadda ka socda, bannaanka ayaa ay soo dhigeen wixii dhacay, laakiin warbaahinta Maraykanku dan kama gelin.

Dadka la diley 1980, sannadihii u dambeeyey ee Kaartar waxa ay gaadhayeen tobannaan kun, kadibna sannadihii u horreeyey ee Riigan waxa ay gaadheen saddex iyo toban kun. Bishii Aktoobar sannadkii 1980, baadarigii cusbaa waxa uu canbaareeyay xasuuqa ay dawladdu ku hayso rayidka fara madhan.

Laba bilood uun kadib, Joosee Naabulyoon Duyuu'aart 'José Napoleón Duarte' waxa uu bogaadiyay ciidamadii amniga ee dhexdhexaadka ahaa ee Maraykankuna jeclaa adeeggooda geesinnimada leh ee ay ku caabbiyaan shacabka qas wadayaasha ah, waana markii Juunta madaxa looga dhigay kadib.

Duyuu'aart 'Duart' waxa uu ahaa daaha lagu qariyo gefalkii taliyayaasha ciidanka iyo mid doonyaqaad u ah sii socoshada taageerada Maraykanka, weliba markii nidaamkii talinayey ku ceeboobay kufsashadii afar dumar ah oo baadariyaal reer Maraykan ah. Arrintaasi dood ayaa ay dhalisay, in la kufsado naagaha Salfadoor iyo in la kufsado kuwa Maraykanka

waa ay kala duwan yihiin, waana gef aad u weyn oo saamaynaya xidhiidhadii guud. Waa ay ka gaabsatay warbaahinta Maraykanku hawshan, iyada oo looga dambaynayay maamulkii Kaartar madaxa u ahaa iyo guddidii dembi-baadhista ee uu soo diray.

Maamulkii Riigan waaba ku sii talaxtegay ujidbixinta dhacdadan, gaar ahaan, Wasiirkii Arrimaha Dibadda ee Alaksanadar Heeg ‘Alexander Haig’ iyo wakiilkii Maraykanka ee Qarammada Midoobay Jeen Keerkibaatrik ‘Jeane Kirkpatrick’, heer la isla gaadhay in maxkamad bug ah oo qaabka uun maxkamad ka ah la isa saaro, iyada oo si rasmi ah loo xukumay dambi la’aanta Juunta iyo cidda taageertaba.

Waxaa laga takhallusay labadii joornaal ee faafiyey foolxumooyinkii Juunta ka samaysay Salfadoor, iyaga oo aanba safka mucaaradka ahayn, laakiin sida muuqata isxakamayntooda ayaan raalli gelin xukuumaddii millateriga ahayd. Waxaa si hoose loo dilay madaxii tifaftirka labada joornaal mid ka mid ah, halka kii kalana uu huri waayey in uu dalka ka cararo.

Dhabtii, uma arkayn wargeysyada Maraykanka ka soo baxaa in arrimahani ay mudan yihiin in laga hadlo, marka laga yimaaddo hadallo yaryar oo is ka kooban.

Bishii 11 ee sannadkii 1989, ciidanku waxa ay dileen lix baadari oo Jeesuut ah ‘Jesuits, ⁷’ waxaana la socday cunto-karisadoodii iyo gabadheedii. Isla isbuucaas ayaa ay ciidanku dileen wax aan ka yarayn 28 muwaadin, oo ay ka mid ahaayeen: hoggaamiye mid ka mid ah midowyada, madaxa ururka haweenka jaamacadaha dhigta, sagaal ka mid ah xubnaha ururrada beeraleyda ee Hindida ah, iyo toban arday jaamacdeed ah.

Weriyaha De Asooshiyayt Barays ‘The Associated Press’ Dooglas Garaant Maayn ‘Douglas Grant Mine’, waxa uu faafiyey sida askartu u soo jabsadeen xaafad shaqaale oo ay ugala baxeen lix nin oo uu ka mid yahay cunug 14 jir ah. Kadib, inta ay gidaar hor dhoobeen ay rasaas ku fureen.

Dadkaas la diley baadariyaal ma ahayn, kamana tirsanayn haayadaha xuquuqul insaanka; sidaa darteed, cidina isma weyddiin.

Sida oo kale, cidna dan kama gelin warkaa uu faafiyey weriyaha De Asooshiyayt Barays.

Guutada Atlaakaatal ‘Atlacatl waxa ay si qarsoodi ah u dishay koox baadariyaal Jeesuut

⁷ : Jesuits waa urur diimeed hoos yimaadda mad’habka Kaasooligga ah ee kiristanka.

ah, waana guuto aad u heer sarraysa, waxaana sameeyay oo tababaray Maraykanka.

Guutadani waxa ay samaysantay sannadkii 1981, markii dugsiga ciidammada gaarka ah ee Maraykanku uu shan iyo toban khabiir u diray Salfadoor; si ay uga hortagaan gadoodkii ka socday.

Waxa ay ku ibo-furtay guutadani dil wadareed ay geysteen. Tababare Maraykan ah oo arrintan tilmaan ka bixinaya ayaa yidhi: “Waa bahalo. Waxa nagu adkayd in aan ku qancinno in ay maxaabbiis keenaan intii ay keeni lahaayeen dhegaha iyo xubnaha dadkii ay soo laayeen!)

Bishii 12, sannadkii 1981, guutadani waxa ay ka qayb qaadatay xaflad dil wadareed loo geystay kun qof oo rayid ah, waxaana xafladda cidhiq ka ahaa kufsi iyo gubid. Intaa kadib, waxa ay ka qayb qaateen duqaynta tuulooyinka iyo laynta boqollaal rayid iyo maato ah. Waxa la jarjaray dumarkii, carruurtii, iyo waayeelkii iyaga oo ahaa ciddii ugu badnayd ee dhibbanaha u ahayd.

Salfadoortii dimuqraadiga ahayd, carruurta waxa lagu khasbi jiray in ay da’da 13 jirka ciidanka ku qortaan, si loogu laqimo hababka Naasiga ah ee wax loo dilo, iyada oo loogu darayo kufsiga.

Nin ka baxsaday ciidanka Salfadoor oo magangelyo siyaasi ah ka helay Tagsas “Texas” sannadkii 1990, (magaciisa waan qarinayaa si aysan u soo raadsan kooxaha geeridu), ayaa tilmaan ka bixiyay hababka ay adeegsadaan ciidanka Salfadoor, iyada oo ay Wasaaradda Arrimaha Dibaddu codsatay in ninkaa dib loogu celiyo Salfadoor.

Sida uu isagu yidhi, waxa waajib ku ahaa kuwa ciidanka si iskood ah ugu soo biira in ay laayaan eyda iyo shinbiraha iyaga oo darayo ku dilaya, waxaa waajib ku ahaa in ay daawadaan sida loo jidh dilayo kuwa looga shakiyo in ay baxsanayaan, iyada oo laga siibayo ciddiyaha, lana gawracayo, xubnahoodana la jarjarayo, kadibna lagu ciyaarayo xubnaha laga jaray.

Baadarigii Kaasooligga ahaa Daaniyaal Saantiyaago ‘Daniel Santiago’ waxa uu u sheegay joornaalka Ameerika ee ay soo saaraan Jeesuutku haweeney beeraley ahayd oo ku soo laabatay gurigeeda kadibna la kulantay carruurteedii saddexda ahayd, hooyadeed, iyo walaasheed, oo fadhiya miiska cuntada, mid walbaana madaxiisu horyaallo, gacmihiisana ku haya madaxii laga jaray, miiska dhexdiisana waxa qotoma weel weyn oo dhiig ka buuxo!

Kooxaha geeridu kuma gaabsadaan dilka muwaadiniinta Salfadoor, laakiin madaxa ayaa

ay ka siibaan markaasay looxyo sudhaan, mindhicirka ayaa laga siibaa, ragga xubnahooda taranka ayaa laga jaraa oo afka loogu ridaa. Ilaalada qaranku kuma gaabsadaan kufsigu dumarka, laakiin ilmo-galeenka ayaa ay ka soo ridaan, kumana gaabsadaan laynta carruurta, laakiin waxa lagu kor jiidaa siligyada iyaga oo aabbayaashood arkayaan.

Waxa la gawracay tobannaan kun, in malyan ka badanna qaxoonti ayaa ay noqdeen. Tani waa mid ka mid ah dhacdooyinka ugu fooshaxun ee Maraykanku ku kacay.

Nikaragwa oo Cashar Loo Dhigay

Qolyihii warbaahinte ee Maraykaanku is kama aysan indhatirin Salfadoor oo keliya. Warbaahintu, intii aan talada dalka la dhaafin kelitaliskii Anastaasiyo Soomuusa ‘Anastasio Somoza’ 1979, waxa ay ka faafisay wax aan hal saacad ka badnayn, saacaddaasna waxa ay ahayd dhulgariirkii ka dhacay Maanagwa ‘Managua’⁸ sannadkii 1972.

Wargeyska Niyuu Yook Taymis waxa uu ka faafiyey Niikaraagwa saddex qormo intii u dhaxeysay 1960 ilaa 1978. Mana ahayn Niikaraagwa mid aysan dhacdooyin ka dhicin, laakiin waxa aan jirin wax halis gelinaya kelitaliye Soomuusa.

Markii halisi ay soo foodsaartay taliskii Soomuusa dhammaadkii toddobaatameedyadii, iyada oo halistu ka imaanayso Saandistaska ‘Sandinistas’, Maraykanku waxa uu xoogga saaray in uu dhidibbada u aaso waxa lagu magacaabo Soomuusa-nimo bilaa Soomuuse ah, taasoo la micne ah; in dhidibbada loo aaso nidaam musuqmaasuq ah oo kelitalis ah uusanna Soomuusa madax ka ahayn.

⁸ . Caasimadda Niikaragwa.

Madaxweyne Kaartar waxa uu is ku deyey in uu daayo sii-jiritaanka ilaalada qaranka; si ay saldhig ugu noqdaan awoodda Maraykanka.

Ilaalada qaranku waxa ay caan ku noqdeen bahalnimo iyo saadinimo 'Sadistic.' Bishii 6, ee sannadkii 1979, ciidanku waxa uu jabhadda Saandistas ku sameeyey dhacdooyinkii ugu fooshaxumaa. Guryahoodii ku yaallay Maanagwa ayaa ay duqeeyeen, iyaga oo dilay tobannaan kun. Markaas ayaa safiirkii Maraykanku u diray Aqalka Cad farriin ah: waa in aynnu kula talinnaa ilaalada qaranka Niikaraagwa in ay duqeynta joojiyaan; sababta oo ah, waxa ay caqabad ku tahay in ay talada sii hayaan, Saandistaskuna bannaanka ka joogaan.

Maalmo yar kadib, Soomuusa waxa uu u cararay Miyaami, isaga oo jiidanaya hantidii Niikaraagwa, kadibna ilaaladii qaranku waa ay burburtay.

Sidoo kale, Kaartar waxa uu tahriibiyey hoggaamiyayaashii ilaalada qaranka, isaga oo ku qaaday diyaarad ay leedahay Laanqeyrta Cas (waana faldambiyeed dagaal marka dhanka qaanuunka laga eego). Waxa uu bilaabay in uu dib uga soo abaabulo ciidankii ilaalada qaranka xuduudda Niikaraagwa, Arjantiin ayaana wakiil uga ahayd. Xilligan Arjantiin waxaa ka talinayey

janaraallo Naasiyiin ahaa oo cusbaa, kuna jiray waqti gaaban oo nasasho ah oo ay kaga nasanayeen jidh-dilkii iyo layntii dadkooda; si ay uga qayb qaataan soocelinta ilaalada qaranka. Ilaaladii qaranku waa ay soo laabteen iyaga oo magac cusub oo Kontaraas ama Udagaallamayaasha Xorriyadda wata.

Riigan waxa uu oodda ka qaaday Kontaraas iyaga oo dagaal argagixisannimo ah ku qaaday shacabkooda, waxaana raacay dagaal dhaqaale oo ka xumaa, waxa uuna u gooddiyey oo u hanjabay cid kasta oo damacday in ay shacabka u gurmato.

Maraykanku isaga oo Kontaraas la garab taagnaa kaalmo ciidan oo badan, haddana waxa uu ku fashilmay soo afjarka dagaalka.

Maxaa keenay in Maraykanku Niikaraagwa ilaa xadkaas fara geliyo?!

Ururka dawlga ah ee hormarinta Okosfaam (Oxfam) waxa uu caddeeyay sababta dhabta ah iyaga oo u cuskanaysa khibradda ay u leeyihiin 76 dal oo soo kobcaya oo ay ka soo shaqeeyeen. Waxa ay arkeen in Niikaraagwa ay dalalkaa ka duwan tahay marka la eego sida ay dawladdu isugu xilqaamayso wanaajinta nolol maalmeedka shacabkeeda, ayna u dhiirrigelinayso ka-qaybqaadashada midha dhalka ah ee arrinkaas.

Waxa ay kaga duwanayd Niikaraagwa waddamada Ameerikada dhexe ee Okosfaam ka soo shaqaysay (Salfadoor, Guwaatameella, Honduraas, iyo Niikaraagwa) qorshayaasheeda iyo adeegyadeeda bulsho ee la xidhiidhay waxbarashada, caafimaadka, iyo dhul yeelashada, gaar ahaan dadka saboolka ah.

Haayadaha kalana waxa ay sheegeen sheekooyin lamid ah oo ku saabsan guusha Niikaraagwa. Sannadkii 1983, waxa uu sheegay Bangiga Caalamiga ah ee Horumarinta ee Maraykanku: “Niikaraagwa in ay xaqiijisay horumar ballaadhan oo dhanka arrimaha bulshada ah, kaas oo u noqonaya gundhig horumar bulsho iyo mid dhaqaale wakhti dheer.”

Guushii Saandistas ee dib-u-habayntu waxa ay cabsi gelisay qorshadejiyayaashii Maraykanka. Waxa ay ka cabdsadeen sida uu xusay Joosee fiigari ‘José Figueres’ oo ah aabbaha Dimuqraadiyadda Koostariika: “In markii ugu horreysay talada dalka Niikaraagwa ay qabteen dad shacabkooda danaynaya.”

Isaga oo Fiigari ahaa hoggaamiyaha Dimuqraadiyadda Ameerikada dhexe muddo 40 sano ah, haddana aragtidiisaa qotodadheer in warbaahinta Maraykanku soo gudbiso mamnuuc ayaa ay ahayd.

Mid ka mid ah masuuliinta Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Maraykanku waxa uu ku faanay: “In ay Niikaraagwa u beddeli doonaan Albaaniyada Ameerikada dhexe.” Waxa uu uga jeedaa: waxa aan ka dhigaynnaa waddan sabool ah oo go’doonsan oo raadikaal ah, ilaa ay ka burburto riyadii Saandistas ee ahayd in Niikaraagwa ay noqoto muunad ay ku daydaan waddammada kale ee ku yaal Ameerikada dhexe.

Jooj Shooltas ‘George Shultz’ waxa uu yidhi isaga oo ka warramaya Saandistas: “Waa Kansar ay tahay in la dabarjaro, waaana hawl u taalla darafyada kale ee siyaasiga ah.”

Hoggaamiyaha Leebraaliga ah ee ka midka ah golaha guurtida Aalan Karaanistoon ‘Alan Cranston’ waxa uu yidhi: “Haddii ay innoo suura geliweydo baabi’inta Saandistaska, waa in aynnu malax ka matajinnaa.”

Sababtan darteed ayuu Maraykanku weerar saddex geesood ah ugu qaaday Niikaraagwa:

Marka koowaad: Waxa uu ku dirqiyey Bankiga Caalamiga ah iyo Bangiga Horumarinta Caalamiga ah ee Maraykanka in ay soo afjaraan mashruucyadooda iyo kaalmooyinkoodaba.

Marka labaad: Waxa uu huriyay colaad uu u adeegsaday Koontaraas iyaga oo dhinac wada

dagaalkii dhaqaale; si ay u soo afjaraan halista tusaalaha wanaagsan iyo in laga takhalluso himilooyinkii dib-u-habaynta bulsho iyo kobcinta dhaqaale.

Mid ka mid ah weriyayaasha ugu wanaagsan Ameerikada dhexe oo lagu magcaabo Juuliyaa Barastoon ‘Julia Preston’ _oo u shaqayn jiray Booston Goloob ‘Boston Globe’ ayaa qoray: “Masuuliin maamulka Maraykanka ka tirsan ayaa caddeeyey in ay raalli ka yihiin in ay arkaan Koontaraas oo Saandistas daciifinaysa, kuna khasbaya in ay kheyraatkii dabiiciga ahaa ee dhifka ahaa dagaalka u adeegsadaan, halkii ay u adeegsan lahaayeen barnaamijyada bulshada, oo ka dhigan dabagaddin ‘tusaalihii wanaagsanaa’ lagu sameeyey, kaas oo ahaa halistii laga cabsanayey in ay waddammada kalana ku daydaan, dabadeedna nidaamkii Maraykanka ee ku dhisnaa dhaca iyo laaluushku uu burburo.

Waxa aynnu u dirnay kaalmooyin bini’aadantinnimo oo aad u badan kadib dhulgariirkii dhacay sannadkii 1972, kaalmadaas badankeeduna waxa ay saldhigatay jeebabka Soomuusa iyo saaxiibbadii. Halka dhacdadii dhacday Aktoobar sannadkii 1988 (duufaankii Juwana) oo dhibtiisu ay ka badnayd dhibaataadii dhulgariirkaa hore aynnu diidnay in

aynnu dirno wax kaalmo iyo gargaar bini'aadantinnimo ah, xulafadeennana waxa aynnu ku dirqinnay in ay sideenna oo kale yeelaan; sababtoo ah, waxa ay u badnayd in ay shacabka gaadho.

Dhibaatooyinka duufaankaas waxa aynnu uga faa'iidnay dhaqaale ahaan, innaga oo sheegannay in maamul xumada ka jirtaa ay sababtay baahida iyo diihaalka. Marba haddii aysan inna hoos imaanayn, waxa ku waajib ah in ay gaajoodaan oo bakhtiyaan.

Marka saddexaadna: Waxa aynnu adeegsannay dhagar iyo khiyaano dibloomaasiyadeed. Tooni Afiirigaan 'Tony Avirgan' waxa uu wargeyska Miisoameerika 'Mesoamerica' ee ka soo baxa Koostariika ku qoray: "Saandistas waxa ay ku dhaceen dabinkii uu u dhigay madaxweynaha Koostariika ee Ooskaar Aariyaas iyo dhammaan madaxda Ameerikada dhexe."

Heshiiskii nabadda ee ka dhacay Niikaraagwa sannadkii 1987, bishii 8aad, waxa uu ahaa heshiis wanaagsan. Waxa uu qoray Afiirgan 'Avrigan' in ay soo hormarinayaan doorashooyinka bilo yar, ayna oggolaan doonaan kormeer caalami ah, sidii ay sameeyeen sannadkii 1984, iyaga oo dhaafsanaya in la sii daayo Koontaraas dagaalkana la joojiyo.

Waa ay isu xilqaantay xukuumaddii Niikaraagwa oofinta heshiiskii nabadda, laakiin cid kale dan iyo heello toonna kama gelin, ma danayn Aariyaas, Aqalka Cad, Koongareeska iyo sirdoonka Maraykanku toonna, bal saddex jeer ayaa ay sii laba jibbaartay taageeradii ay Koontaraas siineysay. Bilo ka dibna, heshiiskii nabadda hoygiisii kama dambaysta ahaa baa loo gelbiyey.

Markii ol'olaha doorasho bilaabmeen, waxaa Maraykanku caddeeyay in cunaqabataynta dhaqaale uu ku sii hayn doono dalka, dhaqdhaqaaqa Koontaraaskuna sii socon doono, haddii Saandistaas ay doorashooyinka iyagu ku soo baxaan.

Doorasho xor ah cidna uma arkayso doorashada iyada oo socota Maraykanku dagaalka dhaqaale ku hayo ee uu ku taageerayo argagixisada Koontaraaska.

Bal ka warran, haddii sidan oo kale dalalka cadawgeenna ahi samayn lahaayeen. Adiga ayaa aan kaaga tegayaaye, bal suureyso sida ay warbaahintu u soo tebin lahayd.

Arrinka ugu layaabka badan waa in haddana Saandistaas ay heleen 40% codadkii. Cinwaannada ugu waaweyn ee wargeysyada Niyuu Yook Taymisna waxa ku xardhanaa bishaaro “Siyaasaddii Maraykanka ee

caddaaladda ahayd oo guuleysatay” iyo
“Farxaddii dadkoo dhan mideysay!”

Waxqabadyada Maraykanka ee Ameerikada dhexe waxa ay ka wada tarjumayaan arami iyo dhibaato baaxad weyn, sababtuna maaha weynida khasaaraha nafeed keliya, ee waa in dhab ahaantii ay jirtay kansho lagu xaqiijin karayey horumar ballaadhan oo dhanka bulshada iyo Dimuqraadiyadda ah, kadibna xaqiijinta baahiyaha dadka. Saansaanka guushu waxa uu ka soo bidhiiqay Salfadoor, Guwaatameella, iyo Niikaraagwa, dhab ahaantiina waa waxa ay ka baqayeen qorshadejiyayaashii siyaasadda Maraykanku, xididdada ayayna u siibeen meelihii halistu ka imaanaysey, ilaa muddo dheer oo dambe.

Guwaantameella oo Goob Dagaal

Laga Dhigay

Waxaa jirta goob ku taal Ameerikada dhexe oo warbaahinta Maraykanku ay danaysay oo ka faallootay: waa Guwaatameella.

Kacdoon ayaa ka dhacay sannadkii 1944, oo dhidibbada u taagay xukuumad dimuqraaddi ah, xukuumaddaas oo muunad ka dhigatay 'heshiiska cusub' ee Roosefelti. Waxaa bidhaamay ifafaalaha guul dhaqaale oo madaxbannaan.

Waashinton aad ayaa ay arrinkaa uga cadhootay, sirtoonka Maraykankuna waxa uu sawiray halisaha ka imaan kara Dimuqraadiyadda hantigoosadka ah ee Guwaatameella. Aysanhaawar iyo Daallas waxa ay ka digeen in amniga Maraykanku uu halis ku jiro, haddii aan fayraskaa laga takhallusin.

Dokumenti ay sirtoonka Maraykanku soo saareen 1952, waxa ay Guwaatameella ku tilmaameen meel halis ku ah danaha Maraykanka, ayna sadheeyeen hantiwadaaggii iyo shuuciyiintii suuqgeynayay barnaamijyada dib-u-habaynta dhaqaale iyo siyaasadeed ee waddaniga ahaa, kuwaas oo taageera dhaqdhaqaaqyada lidka ku ah Maraykanka.

Dokumentigu waa uu sii socday isaga oo faahfaahinaya shacbiyadda ay xukuumadda Guwaatameella ku kasbatay xayiraaddii ay saartay danaha dhaqaale ee shirkadaha shisheeye, gaar ahaan, shirkadda furuutka ee Yunaytidh, iyada oo loo danaynayo shirkadaha waddaniga ah.

Arrinku waxa uu ka sii daray kolkii dib-uhabayntii dhulku guulaystay, waxaana halis noqotay in wadddamada deriska la ahina ay ku daydaan.

Warka oo kooban, xaaladdu waa ay ku adkaatay Maraykanka, ilaa uu gaadhsiiyay afgenbi ciidan. Waa taliskaas ciidan ee ilaa hadda xukuma, oo mararka qaarna aynnu fara gelinno si aynnu arrimaha qaar u maaraynno.

Bahalnimadu xadhkaha ayaa ay goosatay dhammaadkii toddobaatameeyada, arrinkaa oo dhaliyay bannaanbaxyo iyo cabashooyin afka ah, laakiin taageerada millateri ee xukuumadda cusub la siinayay ma aysan joogsan, xitaa xilligii uu talada hayay maamulkii Kaartar 'Carter' ee danayn jiray xuquuqda aadanaha. Waxa innagula socday xulufadeenna, gaar ahaan, Israa'iil (taas oo ah xulufada istiraatiiji ah, miyaysan ku guulaysan yagleelidda argagixisannimada dawladaysan?)

Xasuuqu xilligii Riigan, waxa uu noqon gaadhay wax lagu faano!

Waashintoon waxa ay taageertay Riyoos Moon 'Rios Montt' waxa uuna ku bogaadiyay Riigan in uu yahay nin u hagar baxa Dimuqraadiyadda. Moon waxa uu ku guulaystay bilowgii siddeetameeyadii in uu gawraco tobannaan kun, badankoodu waxa ay ahaayeen Hindidii karmaha iyo dhulalka sare ku noolaa, iyada oo aan la soo koobi karin inta jidh-dil iyo kufsi u qudh baxday, gobollada qaarna wax hal naaskeed gaadhaba lagagama tegin.

Sannadkii 1988, argagixisadii xukuumaddu (iyada oo Maraykanku taageerayo oo maalgelinayo) waxa ay qarxiyeen wargeyskii cusbaa ee Laa libookaa. Falkaa oo aysan dawladda iyo xukuummadda toonnu aysan soo hadal qaadin. Se markii dhawr dhacdo oo dhacay dartii uu isla xidhay wargeyskii Laa Baransaa, ee Maraykanku maalgelin jiray, taageerina jiray argagixisadii ciidanka, ee Maraykankuna dhab ahaan u maalgelin jiray, kaas oo ku baaqi jiray in la rido xukuumaddii Saandistaha, waxaa isqabsaday qaylada iyo buuqa lagula dul dhacay xukuumaddii kelitaliska ahayd.

Werihihii wargeyska Laa Libooka ee Juuliyoo Goodooy 'Julio Godoy' waxa uu ka cararay

Guwaatameella kadib markii la qarxiyay wargeyskiisa, waxa uuna yidhi sida laga soo xigtay dibloomaasi reer galbeed ah: “Ma jirto wax rajo ah oo laga qabo dalka, ilaa inta ay Maraykanku habdhaqankooda wax ka beddelayaan!”

Kuduulistii Banama

Banama waxa ay gacanta ugu jirtay koox yar oo reer Yurub ah, kuwaas oo dadka deegaanka ka noqonaya wax ka yar 10%. Waxa uu arrinkaasi is beddelay sannadkii 1968, kolkii uu hoggaamiyay janaraal Oomaar Toorrijo ‘Omar Torrijos’ afgambi u oggolaaday madawga, iskadhalka iyo danyartaba in ay qayb ka noqdaan taliskiisa.

Toorrijo waxa lagu dilay shil diyaaradeed 1981, sannadkii 1983, waxaa xukunka la wareegay Maanwel Nooriigaa ‘Manuel Noriega’ oo ahaa danbiile u soo shaqeeyay Toorrijo iyo sirdoonkii Maraykankaba.

Xukuumaddii Maraykanku waa ay ogayd in Nooriigaa uu ku soo dhex jiri jiray kaganacsiga maandooriyaha ilaa iyo 1972, haddii uusan ka horraynba. Maamulkii Niksoon ‘Nixon’ waxa uu doonayba in uu dilo, se waxa ka hor istaagay in uu ku jiray bayroolka sirdoonka Maraykanka. Sannadkii 1983, waxa ay sheegtay warbixin ay soosaareen mid ka mid ah guddiyada Koongareesku in Banama ay xarun u tahay ganacsiga maandooriyaha iyo maydhaaminta xoolaha.

Maraykanku waxa uu sii waday qaddarinta adeegyadii Nooriiga. Bishii 5aad, sannadkii 1986, waxa uu bogaadiyay maamulaha

wakaaladda ladagaallanka maandooriyuhu siyaasaddiisa daran ee ku aaddan ladagaallanka maandooriyaha. Sannad kadibna waxa isla maamulihii uu bogaadiyay wadashaqaynta xeesha dheer ee innagala dhexaysa Nooriigaa, halka uu joojiyay xeer ilaaliyaha guud ee lidwin Miisi ‘Edwin Meese’ baadhitaannadii wasaaradda caddaaladdu ay ku daba joogtay dhaqdhaqayadii Nooriigaa ee falaldanbiyeedyada ahaa.

Bishii 8aad, sannadkii 1987, Ilyoot Abraamis ‘Elliott Abrams’ oo ka mid ah masuuliinta arrimaha dibadda ee Maraykanka waxa uu diiday go’aan lagu canbaareeyay Nooriigaa.

Intaas oo dhan ka imoow, markii Nooriigaa lagu soo oogay denbiyo lagu tuhunsanaa sannadkii 1988, waxa denbiyadaas dhammaantood, mid mooyee, ay dhaceen wixii ka horreeyay 1984, markii uu ahaa adeegaheenna danaheenna u jajaban.

Sheekadan waa mid la wada hayo oo soo noqnoqotay, xaakimku waxa uu ahaanayaa saaxiibkaaga wacan ee aad taageertid oo ammaantid ilaa uu ku dhacayo denbiga weyn ee ah in uu madax bannaanaado oo kaa xoroobo.

Gefka shaacbaxay waa in uu ka soo gudbo xaditaanka iyo dhaca shacabkiisa oo uu soo fara gashado danaha shirkadaha iyo ganacsatada

waaweyn ee reer Maraykan. Nooriigaa waxa uu noqday mid lagu tuhmo denbiyadaa badhtamihii siddeetameeyadii. Sidoo kale, waxa uu ka labalabeeyay garab siinta Koontaraska. Dhab ahaantiina madaxbannaanidiisu waxa ay halis gelinaysay danaha aynnu ka leennahay kannaalka Banama.

Laga soo bilaabo 1-da Jannaayo, sannadkii 1990, Banama waxa ay dib u soo ceshanaysay badanka kannaalladeedii, kannaalkeeda oo dhammaystiranna waxa uu gacanteeda ku soo noqonayaa sannadka 2000; sidaa darteed, waxa waajib innagu ah in Banama ay gacanteenna ku jirto ka hor inta aysan kannaalkeeda hantiyin.

Laakiin mar haddii ay dhimatay kalsoonidii aan ku qabnay Nooriigaa waa in uu inna weydaartaa. Sheekada soo noqnoqotaana waxa ay ka bilaabmaysaa in Maraykanku cunaqabatayn dhaqaale ku soo rogo; si dhaqaalaha Banama uu u burburo. Kolleyba culayska ugu badani waxa uu ku dhacayaa danyarta saboolka ah, dabadeed, shacabka Banama ayaa Nooriigaa nacaya (iyada oo ay jireen sababo kale oo ay u nacaan), markaas ayaa ay jeclaysanayaan in uu dhaaf.

Xilligaas ayaa afgenbi dhici karaa, waana arrinkii dhacay, se dhicisoobay! Ilaa ay timi bishii 12aad, sannadkii 1989, markaas oo ay

Ameerikaanku u dabbaaldegeen dumitaankii gidaarkii Baarliin iyo dhammaadkii dagaalkii qaboobaa. Markaas ayaa ay ku duuleen Banama, waxa ayna dileen boqollaal iyo kumannaan, waxaana maamulkii dib gacanta loogu geliyay kooxdii caddaanka ahayd, iyagu ha u dabbaal degeen in kannaalkii ku soo wareegay xukuumaddooda sida daacadda ah ugu adeegaysa danaha Maraykanka!

Warbaahinta Maraykanku waxa ay raacday jidkii xukuumadda intii hawlgalku socday, si xeeldheer ayaa ayna u xusheen halyeeyada iyo sharwadayaasha. Wixii aynnaan waxba ka soo qaadi jirin denbi ayaa aynnu u aragnay. Tusaale ahaan, doorashadii madaxtinimada ee Banama sannadkii 1984, waxaa ku guulaystay Aarnoolfo Aaryaas ‘Arnulfo Arias’ se waxaa doorashadii ku shubtay Nooriigaa isaga oo awood adeegsanaya.

Amintaa waxa uu Nooriigaa ahaa wiilkeenna baarriga ah ee Banama innoo jooga, halka uu Aaryaas ahaa mid xanbaarsan isaga iyo xisbigiisuba bakteeriyadii waddaniyadda ee ka badbadiska ahayd.

Sidaa darteed, waxa la gudboonaaday maamulkii Riigan in uu u sacabbiyo guushii Nooriigaa uuna u diro Wasiirka Arrimaha Dibadaa Jooj Shuultas ‘George Shultz’; si uu si gaar ah ugu hanbalyeeyo Dimuqraadiyadda

cusub ee ka curatay Banama, laga yaabaa in ay ku daydaan Saandistaha habawsaniye. Warbaahinta Maraykanku waxa ay isha ka lalisay in ay dhaliisho doorashadii Banama ka dhacday.

Nooriigaa waxa uu soo celiyay kaartaysigiisii doorashadii 1989, jeerkan waxa uu xaday oo kaga shubtay ganacsadihii weynaa ee Geellaarmo Indaara ‘Guillermo Endara.’ Waxa uu sameeyay Nooriigaa cunfi intii hore ka yar, se waxa maamulkii Riigan uu u sheegay in uu meesha banneeyo, markaas ayaa folkaaanihii cadhada ee warbaahinta Maraykanku qarxay oo ay tooshka ku ifiyeen xadgudubyadii Nooriigaa uu Dimuqraadiyadda u geystay.

Intaa kadib, waxaa cirka isku shareeray dhawaqa meel-kagadhaca xuquuqda aadanaha, arrinkaas oo aan hore indhahooduna u arag dhegahooduna u maqal.

Markii Maraykanku ku duulay Banama bishii 12aad, sannadkii 1989, waxa warbaahinta Maraykanku ay ka faraxasheen hawlgal ay ku guulaysteen oo ay shacabka Banama ka dhaadhiciyeen shaydaannimada Nooriiga.

Waxa uu Teed Koobel ‘Ted koppel’ si macangagnimo ah ugu celcelin jiray in Nooriigaa uu lamid yahay Qaddaafi, Iiddi Amiin, Aayatullaahi Khumayni, kuwas oo ay khasab

ahayd in shacabka Maraykanku nacaan. Halka uu Daan Raadar ‘Dan Rather’ uu safka hore ka geliyay liiska tuugta iyo ganacsatada maandooriyaha ee ugu waaweyn.

Dhab ahaantiina, Nooriiga waxa uu ahaa tuug yar oo dhammaan sannadihii uu xasilloonida haystay ku jiray bayroolka sirtoonka Maraykanka.

Sannadkii 1988, waxa wargeyska Ameerika Wooj uu faafiyay warbixin ku saabsan in Nooriigaa uu ku tuntay xuquuqda aadanaha. Laakiin warbixintaas iyo warbixinno kalaba waxa ay caddaynayaan in xilligaasi uu dhaamay xilliyadii ka horreeyay, markii uu Nooriiga ahaa wiilkeenna, xitaa rag badan oo innaga innooga shaqaynayay gobolka ayaa ku kacay gaboodfallo kuwiisa ka daran.

Tusaale ahaan Turuujiilo ‘Trujillo’ diktaytarkii jamhuuriyadda Dominkaan ee aynnu taageernay, Soomuusa ‘Somoza’ diktaytarkii Niikaraagwa, Maarkoos ‘Marcos’ diktaytarkii Filibiin, Dufaaliyer ‘Duvalier’ diktaytarkii Haayti, iyo kuwo kale oo ka mid ahaa madaxdii Ameerikada dhexe siddeetameeyadii.

Dhammaantood waa ay ka bahalsanaayeen Nooriiga, se waxaa si weyn u taageerayay Maraykanka intii ay faraha kula jireen falalka foosha xun ee argagixisanimada ahaa, marba

haddii faa'iidada iyo dhaqaaluhu ku soo qulqulayaan Maraykanka.

Maamulkii Jooj Buush 'George Bush' waxa uu maamuusayay Moobuuto 'Mobutu' iyo Suuhaarto 'Soeharto' oo gaboodfalladoodu ay ka xumaayeen kuwii Nooriigaa.

Isala judhii Maraykanku ku duulay Banama isaga oo ugu dawgelaya in ay xuquuqda aadanaha ku tunteen, waxa maamulkii Buush uu shaaca ka qaaday heshiis tiknoolajiyad heer sarraysa ah oo ay Shiinaha u saxeexeen, arrinkaa oo ay ku cadaadisay xukuummadda ganacsatada waaweyni, waana kadib xasuuqii ka dhacay fagaarihii Tayaanaanmen 'Tiananmen' ee Bakiin ku yaallay ee caanka ahaa.

Sida oo kale, isla maalinkii Banama lagu duulay, Guriga Cadi waxa uu iclaamiyay, dabadeedna uu fuliyay, in cunaqabatayntii laga qaaday Ciraaq, waxaana Wasaaradda Arrimaha Dibaddu ay arrintaa marmarsiinyo uga dhigtay in ujeedka laga lahaa uu ahaa kor-u-qaadidda waxyaabaha aan dhoofinno, iyo in aan diyaarinno xaalad innoo fududaynaysa in waddo tii hore ka fiican aan u marno kadhigidda Ciraaq waddan dhawra xuquuqda aadanaha.

Maraykanku waxa uu sii waday in uu taageero Saddaam oo uu uga hiiliyo mucaaradkiisa, waxa

uuna maamulka Maraykanku dhicis ka dhigay dadaalladii Koongareesku ku eedayn lahaa oo ku oogi laa falal-danbiyeedyadiisii foosha xumaa.

In la is barbardhigo foolxumooyinkii Baqdaad iyo Bakiin ka dhacay iyo foolxumooyinkii uu Nooriiga geystay, waxa isbarbardhiggaas uu Nooriiga u muuqanayaa sida Hooyo Tereza.⁹

Duullaankaa kadib, waxa uu Buush ku dhawaaqay kaalmo gaadhaysa hal bilyan oo Doollar oo Banama la siiyo. 400 oo malyan oo doollar waa dhiirrigelin in Banama wax loo dhoofiyo, 150 malyan waa deyn bangiyadu leeyihiin, 65 malyan waa deymo iyo dammaanaqaadyo la siinayo maalgashadayaasha reer Maraykan.

Maraykanku waxa uu awooddii u soo celiyay raggii bangiyada, waxa ayna bartoodii ka sii anbaqaadeen maydhaaminta lacagaha maandooriyaha, heer haddii la isu eego dadaalladii Nooriigaa ee kaganacsiga maandooriyaha ay noqonayaan dadaalladiisaasi wax aan micno lahayn; sababtuna waa heerka

⁹ : Hooyo Tereza waxa ay ahayd islaan kiristaan ah oo dhaqdhaqaaqyada gargaarka aadannimo ku caan baxday. Ekeysiiinta uu ula jeedaa qoraagu waa in haddii Nooriigaa raggaa danbiilayaasha waaweyn ah la barbardhigo uu noqonayo isagu weli Ilaahay oo dadnimadu biyo dhigtay; waa ekaysiin uu ku muujinayo sida nimankaas ay uga denbiyo badnaayeen Nooriiga.

xaaladdu gaadhay iyo koboca dhaqaale ee Banama oo dhammaantiiba arrinkaa ka dhashay.

Si guud, Banama waxa ay ku noqotay sidii hore ee ay ahayd, hal farqi marka laga reebo, waa in dalka uu maamulo adeege lagu kalsoonyahay.

Tallaaliddii Koonfur Bari Aasiya

Sannadkii 1948, Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Maraykanka waxa u caddaaday in Fiyeet 'Viet' oo ahaa dhaqdhaqaaq iska caabbin jiray Faransiiska, uuna hoggaamiye u ahaa Huu Shaay Miin 'Hu Chi Minh' in uu yahay dhaqdhaqaaqa waddaniga ah ee dalka ka jira. Laakiin marna ma aysan oggolaayn in hoggaaminta ay yeeshaan koox yar.

Dhaqdhaqaaqani waxa uu doorbiday horumarin dhaqaale oo madaxabannaan, waxa uuna iska indha tiray danihii maalgashadayaasha shisheeye.

Waxa aad looga baqay in Fiyeetku ay guulaystaan, waana halis in fayraskoodu ku faafo gobolka.

Fayraska maxaa lagu daweeayaa? Marka hore, ka takhalus. Marka labaad, ka tallaal cid kasta oo aad uga cabdsanaysid in uu gaadho. Sidani waa tallaabooyinka istiraatiijiga ah ee Maraykanku ku maareeyo waddammada caalamka saddexaad.

Sida ugu habboon waa in ciidammada waddankaasi ay fayraska burburiyaan, haddii uusan qorshahaasi guulaysan, waa in ciidammadaadu ku ruqaansadaan. Inkasta oo arrinkani dhib badan yahay uuna foolxun

yahay, laakiin mararka qaar waa lagamamaarmaan.

Fiyetnaam waxa ay ka mid tahay waddammada innagu khasbay in ayunnu innagu shaqadeenna qabsanno.

Maraykanku waxa uu biyo col dhaanshay ka dhigay dhammaan iskudayadadii lagu maarayn lahaa loollannadii ka jiray ilaa dhammaadkii lixdameeyadii, xitaa iskudaydii janaraal Saygoon ‘Saigon;’ sababta oo ah, haddii ismaandhaafkaa jiray la maareeyo waxaa imaanaya suuragalnimada in ay ku guulaystaan in ay horumar sameeyaan iyaga oo uusan Maraykanku ku lug lahayn. Waana arrin aan la aqbali karin.

Taa beddelkeeda, Fiyetnaamta koonfureed waxa aynnu ka aburnay nidaam argagixiso ah. Waa isla wixii aan ka soo samaynay Laatiin Ameerika. Waxa aynnu gaadhsiinnay figta u sarraysa dawladda, waxa aynnuna diidnay in doorashooyin la qabto illeyn waxa aan hubnaa in kooxda kale ay guulaysanaysee. Waxa aynnu boqnagoynnay doorashadii Laaws ‘Laos;’ illeyn waxa guulaystay qoladii kalee.

Maamulkii Kenedi ‘Kennedy’ waxa uu weerar ku ekeeyay Fiyatnaamtii koonfureed. Joonsoon ‘Johnson’ waxa uu diray ciidan tiro badan, waxa

uuna ballaadhiyay fagaarihii dagaalka ilaa uu gaadhsiiyay Indoo-Jayna oo dhan.

Fayraskii waa dilnay, gobolkaasina nabad buu ahaanayaa ilaa boqol sano oo danbe haddii uu fayraskaa ka bogsado!

Amintii uu Maraykanku ku foogganaa in uu cidhibtiro fayraskii Fiyetnaam, waxa uu si uu uga hortago baahitaankiisa uu taageeray Suuhaartu oo Induuniisiya ka talinayay 1965, iyo Maarkooskii haystay Filibiin 1972. Sidoo kale, waxa uu taageeray talisyadii millateri ee Kuuriyada koonfureed iyo Taylaan.

Reer galbeedku waa ay soo dhaweeyeen afgengebii uu Suuhaartu kula wareegay Induuniisiya, illeyn waxa uu afka ciidda u daray xisbigii keliya ee shacbiyadda buuxda haystaye, haba u xasuuqo arrintaa darteed 700,000 oo qofe! Waa arrinka uu ku tilmaamay mufakirka weyn ee Jeemis Riistoon ‘James Reston’ wargeyska Niyoo Yook Taymis in falkaasi yahay “ifafaalaha guusha Aaasiya” isaga oo bogaadiyay kaalinta weyn ee Maraykanku guushaa ka qaatay.

Reer galbeedku waa ay ku farxeen xidhiidhka cusub ee ay la yeeshen hoggaamiyaha cusub ee naxariista badan ee Suuhaartu, kadib kolkii uu ka faro xashay dhiigga dadkii uu xasuuqay, sida

ay ku tilmaantay Kiristan Saaynis Monitoor
'Christian Science Monitor.'

Wargeyska xushmadda leh ee Landhan
Ekonomisti isna Suuhaarto waxa uu ka yidhi
"Qalbigeenna ayuu degay."

Markii uu soo dhammaaday dagaalkii
fiyetnaam sannadkii 1975, wasaaradda
arrimaha dibaddu waxa ay dadaal badan gelisay
in ay ciqaabto waddammadii aynnu burburinnay
ee innagu soo dhiirraday, arxandarrada ka
dhalatayna waxa ay gaadhay heerkii u sarreeyay.

Jeerkii ay qaar dooneen in ay qalin rasaas u
diraan Kamboodiya, Wasaaradda Arrimaha
Dibaddu waxa ay isku dayday in ay hor istaagto.
Kolkii ay isku dayday Okosfaam in ay u dirto
tobonnaan banbooyinka cadceedda ah,
Wasaaradda Arrimaha Dibadda ayaa diidday.
Haddana waxa uu arrinkaasi mar kale soo
noqday markii ay kooxo diineed isku dayeen in
manjarafado u diraan Laaws; si ay ceelal uga
qotaan meelihii ka nabadgalay duqayntii
Maraykanka.

Markii ay isku dayday in ay Hindiya u dirto
boqol lo' gisi ah dalka Fiyetnaam kadib markii
Maraykanku xoolahoodii ka laayay waxa
arrinkaa hor istaagay Maraykanka oo Hindiya

ugu hanjabay in laga joojinayo taakuladii cuntada.

Ma jirto cid ka arxandaran saadiyiinta Waashintoon iyo dabaqadda waxbaratay, waa ay barten in ku filan oo ay danahooda kale ku raacdaan.

Waxa aynnu gaadhnay heer aynnu taageerno Khamerkii cascasa;¹⁰ si ay Fiyetnaam u dhiig baxdo, fayraskoodana uga takhallusno.

Caalamka saddexaad waa in ay casharkan si wacan u bartaan, waa in aysan cidina ku dhiirran in ay madaxa kor u qaaddo, haddii kale, waxa ay la kulmayaan ciqaab aan looga jincinayn.

¹⁰ : Khamerkii cascasa (Khmer Rouge) waa xisbi ka talin jiray Kamboodiya 1975 ilaa 1979. Heerar kala duwan ayuu maray, waxyaabaha lagu eedeeyo waxaa ka mid ah inuu masuul ka ahaa dhimashada hal ilaa saddex milyan oo qof!

Dagaalkii Khaliijka

Aan iska faydno daaha borobogaandada ee warbaahinta; si aan xaqiiqada u aragno. Markii dalka Ciraaq uu ku duulay Kuwayt 1990, waxa Golaha Amnigu cambaareeyay oo cunaqabtayn saaray Ciraaq. Maxaa markiiba sidaa dhakhsaha badan looga falceliyay? Maxaa ay u ahayd falcelintu mid xooggan oo aan hore iyada oo kale loo samayn?

Maraykanka xulufadiisa warbaahineed ee warbaahinta Maraykanku arrintaa waxa ay u hayaan jawaab diyaar iska ah, kuwaas oo ah:

1: Xadgudubka waddanka Ciraaq sameeyay waa mid gaar ah oo mutaysta in looga faceliyo si qallafsan oo gaar ah. “Maraykanku waxa uu diiddan yahay, sida uu mar walba u diiddanaa, xadgudubka iyo kuwa awoodda adeegsanaya ee qaanuunka jebinaya.” waa warka uu innoo sheegay madaxweyne Buushkii ku duulay Banama iyo madaxweynaha keliya ee maxkamadda caddaaladda ee adduunku ku caanbaaraysay in uu awoodda si sharcidarro ah u adeegsaday, waana kolkii lagu haystay xadgudubkii Maraykanku Niikaraagwa ka geystay.

Waxa ay ku soo celcelinayeen warbaahinta iyo dabaqadda waxbaratayi weedhihi ay ka

xifdiyeen afka madaxweynahooda iyaga oo la muraaqoonaya oo hoggaansan.

2: Waxa warbaahinta iyo dabaqadda wax baratay ay buunbuuniyeen in ugu danbayn Qaramada Midoobay ay dib ula soo noqotay awooddii ay kaalinteeda kaga soo bixi lahayd, mar haddii laga soo gudbay arrintii caqabadda ku ahayd ee dagaalkii qaboobaa.

Waa dood aan macno lahayn haddii loo sii fiirsado, marna ma jirin mabaadi' sare oo Maraykanku lahaa, waxa keliya ee dhacay waa in Saddaam Xuseen ku xadgudbay qolo ay khalad ahayd inuu ku xadgudbo.

Foolxumooyinkii Kuwayt ka dhacay ma gaadhayaan foolxumooyinkii ay saaxiibbadeen ka sameeyeen Ameerikada dhexe, Indoo-Jayna, iyo Induniisiya toonna (weliba ha illaawin in aynnu taageernay dilaa ay dhif tahay in isaga oo kale dib loo arko: waa Bool Buut 'pol pot').

Haddii aynnu u nimaadno arrinta Xamdallaah ee ah in Qaramada midoobay ay awoodeen in ay si fiican kaalintooda uga soo baxaan, waa waxba kama jiraan, se waa war ay sheegaan kuwa dhawra isujaan-goynta siyaasadeed.

Sannado badan ayaa dawladaha tunka weyni jidgooyo ku ahaayeen shaqada Qaramada Midoobay, gaar ahaan, Maraykanka, se midawgii

Soofiyeet iyo caalamka saddexaadi waxba ma hor istaagin. Laga soo bilaabo 1970, waxa Maraykanku codka diidmada qayaxan uu gaashaanka ugu daruuray go'aammadii ugu badnaa, waxa kaalinta labaad soo gelaya Ingiriiska, kaalinta saddexaadna Faransiiska ayaa ku jira, oo xagga adeegsiga codka diidmada qayaxan waxa saddexda kaalmood ee u horreeya ku jira reer galbeedka.

Diiwaankeenna golaha guudna waxa uu lamid yahay diiwaankeenna golaha amniga. Waxa keliya ee ay awoodaan caalamka saddexaadna waa in ay ugu baaqaan kuwa xoogga badan in ay ilaaliyaan xeerarka dawliga ah.

Falcleintii dhakhsaha badnayd ee Qaramada Midoobay waxa keenay waa uun cadaadis kaga yimi Maraykanka, Ingiriiska, iyo Faransiiska.

Markiiba waxa Maraykanku u qalab qaatay dhicisaynta xal kasta oo diblomaasi ah, waxa uuna ciidammadiisii u raray Khaliijka, Ingiriiskuna waa ku raacay. Waxa la diri kari lahaa ciidan ku filan in khatarta looga gaashaanto. Laakiin maxaa xalka diblomaasiga ah lagu nacay?

Asbuucyo yar kadib, weerarkii dalka Ciraaq ku qaaday Kuwayt ee 2-dii bisha 8aad, 1990, waxa muuqday ifafaalaha in xal nabdeed la gaadhi karo. Golaha Amaanku waxa uu soo

saaray go'aanka lanbarkiisu ahaa 660 oo uu Ciraaq ugu baaqayay in ay ciidammadeeda kala baxdo Kuwayt, wada hadallo toos ah oo ku saabsan arrinta xuduuddana ay labada dal yeeshaan.

Golaha Amnigu waxa Ciraaq uu ka sugayay in ay soo gudbiyaan in ay bisha badhtankeeda Kuwayt iskaga baxayaan.

Laba qodob ayaa muuqday:

Kow: Waa in waddanka Ciraaq uu heshiis ku helaa marin khaliijka ah, iyada oo labada mandiqadood ee lamadegaanka ah ee ay mawjadaha baddu daboolen ee dawladda Kuwayt ay kala wareegtay gumaystihii Ingiriiska waagii uu meesha joogay uu marinku noqonayo.

Laba: Waxa ay ahayd in la maareeyo murankii ka dhashay ceelkii shidaal ee Kuwayt iyo Ciraaq isku qabsadeen.

Maraykanku gaashaanka ayuu u daruuray dalabkii Ciraaq iyo waanwaan kasta. Wargeyska Niyuu Yook Taymis waxa uu 22, bisha 8aad faafiyay in maamulka Buush uu ku dheggaan yahay in la joojiyo geedisocodka diblamaasiyadeed; si aan mushkiladda taagan u dhammaan.

Dalabkii ugu danbeeyay ee la iclaamiyay ka hor duqayntii Ciraaq, waxa uu ahaa in si

dhammaystiran Ciraaq uga baxdo Kuwayt, iyaga oo aan soo qaadin arrinka xuduudda. Se arrimo kale ayaa ku xidhnaa, sida: in la burburiyo hubka wax gumaada ee gobolka yaal (xitaa Israa'iil ay burburiso), iyo in la fuliyo dhammaan go'aammadii ay soo saareen Qaramada Midoobay ee ku saabsanaa arrimaha gobolka (oo uu ka mid yahay go'aankii lanbarkiisu ahaa 425 ee soo baxay bishii 3, 1978, kaas oo dhigayay in Israa'iil ay shuruud la'aan uga baxdo koonfurta Lubnaan).

Jawaabtii Maraykanku waxa ay noqotay waddadii diblamaasiyaddu waa ay soo dhammaatay! Waana xaqiiqo ay warbaahinta Maraykanku qarisay, marka laga reebo Niyuus Dheey, oo waxa ayba bogaadiyeen qaayasoorrada mudane madaxweyne Buush.

Bilo ka hor intii aysan Ciraaq ku duulin Kuwayt, waxa uu waddanka Ciraaq diyaar u ahaa in uu burburiyo hubkiisa kiimikaalka iyo baylojikaalka ahba, arrinkaa oo uu u sheegay Maraykanka in uu ku dhaqaaqayo haddii waddamada kale ee gobolkuna ay burburiyaan hubkooda kiimikaalka iyo baylojikaalka ah.

Markaa Saddaam Xuseen waxa uu xulufu iyo saaxiib la ahaa madaxweynaha qaayasoorrada leh ee Buush. Waashintoon arrinkaa waa ay soo dhawaysay iyada oo aan ku xidhin dawladaha

kale ee gobolka, sababtuna maaha keliya in la doonayo in Israa'iil ay sii haysato hubkeeda kiimikaalka iyo bayloojikaalka ah, se waxaaba saanaddeeda ka mid ah labo boqol oo madax oo Nugliyeer ah.

Laakiin hubka wax gumaada ee ay Israa'iil haysato maaha in marna uu soo hadalqaado masuul Ameerikaan ahi, haddii uu soo hadalqaadana waa khaldan yahay. Maxaa waxan oo taakulo ah loo siinayaa Israa'iil haddiiba uu sharciga taakulaynta dibaddu uu u diidayo dawlad kasta laga soo bilaabo 1977, in ay hub nugliyeer ah samaysato?

Maraykanka ayaa boqnagooyay iskuday kasta oo nabad lagaga dhalin lahaa Bariga Dhexe, laguna siin lahaa Falastiiniyiinta xuquuqdooda uu ka mid yahay xaq aaya-ka-tashigu.

Maraykanka keligii ayaa taageero uusan ka daalayn la garab taagnaa Israa'iil. Markii dhibaataada Khaliijku ay cirka isku shareetay waxa Maraykanka iyo Isra'iilba diideen shir caalami ah oo xal loogu raadin lahaa mushkiladda Bariga Dhexe, iyaga oo ku gacansaydhay 144 dawladdood.

Sidii aynnu hore u soo caddaynayba, Maraykanku waxa uu taageeraa xadugudubka, marar badanna isaga ayaa ku kaca, weliba

denbiyo ka xun kuwii Ciraaq ka geysatay Kuwayt.

Tusaale ahaan, gumaysigii Koonfur Afrika ay gumaysatay Naamiibiya, arrinkaas oo ay canbaaraysay maxkamadda caddaaladda ee dawlga ah iyo Qaramada Midoobayba lixdameeyadii. Maraykanka isagu waxa uu raacay “Siyaasadda Deggan” iyo “xidhiidhada wax-ku-oolka ah” muddo sannado ah.

Waxaana guul ku dhammaaday heshiis ay abaalgudkii xadgudubkeeda Koonfur Afrika ku heshay dhul badan oo Naamiibiya ah oo dekeddii dalku ka mid tahay.

Xilligii u dhexeeyay 1980 ilaa 1988, intii Riigan iyo Buush keliya ay xilka hayeen, waxa gacan ka hadalka Koonfur Afrika uu sababay khasaare gaadhaya lixdan bilyan oo Doollar iyo wax ka badan malyan iyo badh ruux oo lagu dilay waddammada deriska ah.

Deedifayntii iyo ku-gacansaydhkii diblamaasiyaddu waxa uu Maraykanka u suurageliyay in uu Khaliijka guulihii uu rabay ka gaadho.

Waxa gacanteenna soo galay ilihii batroolka ee Bariga Dhexe, waxa aynnuna dhaqaalihii badnaa ee aynnu ka dheefnay ku dhisnay

dhaqaalaheenna iyo dhaqaalaha waddanka aynnu xulufada nahay ee Ingiriiska.

Waxa kale oo aynnu maamulnay qaybinta iyo gaadhsiinta baatroolka caalamka intiisa kale innaga oo xoojinnay hormuudnimadeenna, caalamkana siinnay cashar ah in adduunka xoog lagu xukumo.

Ka dib markii aynnu intaa ka dhabaynnay, waxaa waajib innagu noqday in aynnu xaaladda gobolka oo dhan aynnu sidaa ku haynno, xitaa aynnu Saddaam ka ilaalinno in shacabka ama Shiicada ama Kurdiyiintu ay ku gadoodaan.

Laakiin maamulkii Maraykanka uma suuragelin sida uu afhayeenkooda Toomas Firiidmaan u sheegay Niyuu Yook Taymis, wixii adduunka ugu fiicnaa: oo ahaa jabhad Juunta oo kale ah oo Ciraaq ku xukunta gacan bir ah, Saddaamna lagaga maarmo. Waxa uu naawilayay Firiidmaan in uu soo noqdo berisamaadkii uu Saddaam gacanta birta ah ku hayay Ciraaq isaga oo Maraykanka iyo xulufadiisa u danaynaya.

Kiraysiga Shuftada

Qarnigan labaatanaad badankiisa waxa adduunka hoggaaminayay dhaqaale ahaan Maraykanka, markaa oo in dhaqaalaha hub ahaan loo adeegsadaa uu noqday arrin la

majeerto. Hababka loo adeegsanayo waxaa ka mid ah cunaqabataynta aan sharciga ahayn iyo shuruudaha sanduuqa lacagta ee adduunka .

Labaatankii sano ee la soo dhaafay, dhaqaalaha Maraykanka hoos-u-dhac ayaa ku yimi marka loo fiiriyo ka Jabbaan, waxa kale oo hoos-u-dhacay dhaqaalihii Yurub ee Jarmalku hormuudka u ahaa (arrinkan waxa sabab u ah maamul xumadii Riigan).

Laakiin isla amintan ayaa Maraykanku uu si weyn u dhaafay oo uga kor maray dhammaan quwadihii kale ee caalamiga ahaa. Se quwaddii Soofiyeetka uun ayaa awooddiisa taako u dhigi kartay, markii awooddii Soofiyeetku burburtayna waxaa Maraykanku xorriyad buuxda u helay awoodda gacan-ka-hadalka, waana arrinka ay ku nasteen falanqeeyayaasha iyo qorsha-dejiyayaasha siyaasadda Maraykanku sannadihii danbe.

Iska-hor-imaad kasta, dhinac waliba waxa uu iskudayayaa in uu dagaalka u weeciyo dhanka uu ku xooggan yahay. Maraykankuna waxa uu ugu jecel yahay waa dhanka awoodda, se dhanka diblamaasiyadda waa lagala siman yahay haddii aan laga badsanba, keliya waxa uu diblamaasiyadda qaataa marka cadaadis xooggan ama cadaadis waaqici ahi uu ku dirqiyo.

Si uu Maraykanku u dhawro xasilloonida iyo nidaamka uu u dooray caalamka saddexaad waxa uu u baahan yahay waddamo kale oo uu garabka saaro, waddammadaa kalana waa in ay ka danbeeyaan isaga.

Hirgelinta nidaamkaas, dhaqaalaha Maraykanku kuma filna, dhaqaalaha batroolka Bariga Dhexe ka imaanayaana kuma filna. Haddaba waa in Jabbaan iyo Yurub ay bixiyaan kharashka lagu ilaalinayo nidaamkaa danahooda u adeegaya.

Waxa uu diiradda saaray oo xoojiyay mid ka mid ah lafagurayaasha dhaqaale ee wargeyska Shikaago Tiribiyoon in nidaamkaa la ilaashado: “Waxa waajib ku ah waddammada hodanka ahi in ay dhiibaan dhaqaalaha aan ku mudannay ilaalintooda, annaga ayaa suuqa caalamiga ah ee amniga ka talinna, annaga ayaana dhaqaalaha qabsanaynna.” Waa weedh ka timid Shikaago, waana in aynnu si dhab ah ugu dheg raaricinno.

Laakiin in awood la adeegsado si caalamka saddexaad loo qabsadaa waa xalka u danbeeya. Waddada ugu sahlani waa sanduuqa lacagta ee adduunka, waxaa ku xiga hawlgallada sirdoonka, ciidammada Mariiniska ayaa ku xiga. Se mar walbana waa in aad u cagajuglaysaa.

Kiraysiga shuftadu waxa uu dhibaato ka aloosaa gudaha. Waxa kaartadan adeegsaday

dhammaan quwadaha warshadleyda ah ee guulaystay; si ay dawladnimadooda u ilaashadaan, dhaqaalahooda u kobciyaan, una hirgeliyaan dalabyada kaga imaanaya maalgashatadooda, waana mid ka mid ah sababaha guusha.

Maraykanku waxa uu ku dadaalay in uu arrintaa sameeyo, isaga oo u maraya wasaaradda difaaca (iyo wakaaladda hawada sare ee Naasa. Sida oo kale, waaxda tamarta ee samaysa nugliyeerka). Hadda waxa aynnu ku go'doonsannahay gudaha nidaamkaa si aan u dhawranno warshadaheenna tiknoolajiyadda horumarsan farsameeya.

Maamulka Riigan waxa uu keenay mushkilado kale. In hantidu ay gacanta u gasho dad yar iyada oo siyaasado kalana ay xukuumaddu wadatay waxa ay keentay sooshaac baxa loofarnimo badan iyo isticmaal xad dhaaf ah. Ma jirin waxaan ka ahayn maalgashiyo yaryar oo waxsoosaar leh, waxaana kordhay deyntii dalka: tii xukuumadda lagu lahaa, haayadaha dawladda iyo qoysaskaba. Bulshadiina waxa ay yeelatay habdhqanka caalamka saddexaad oo kale ee ay jasiiradaha barwaaqosooranka ahi ku dhex yallaan badaha saboolnimada iyo kadeedka.

Kolka ay xukuumadi ku guulaysato kadhabaynta waxaas oo dhan, waxaa waajib noqonaya in shacabka wax uun lagu jeediyo.

Waa ay jireen waxyaabo kooban oo lagu jeedin karo oo badankoodu soo jireen ahaa, sida in shacabka lagu bajiyo in uu jiro cadow halis badan oo qarka u saaran in uu inna gabagabeeyo, innaga oo taa ku garab wadayna buunbuuninta hoggaamiyayaasheenna garashada badan ee ku dadaalaya sidii ay innoo badbaadin lahaayeen.

Hummaaggaa lagu cabsigelinayaana waxa uu noqday Soofiyeetkii, in kasta oo ay adkayd siddeetamaadkii in si dhab ah loo aamino. Sida oo kale, Qaddaafi iyo argagixisadii waaweynayd ee jaadkiisa ahayd, xitaa ku dar Garanaada iyo Saandiistaha qarka u saarnaa albaabada Tagsas. Ama Nooriiga iyo kooxdii isir ahaan Isbaanishka ahaa, kadibna Carab oo dhan!

Markan, cabsigelinta waxa horyaal u ahaa Saddaam Xuseen kolkii uu sameeyay denbigii keliya ee uu ciqaabta ku mutaystay bishii 8, sannadkii 1990 (denbigaa oo ahaa safka oo laga baxo).

Waa lamahuraan in aynnu daaha ka qaadnaa runta ah in cadawga ugu weyn ee caalamka saddexaad ka jiraa uu yahay (safka oo laga baxo).

Mana aha wax aan la maarayn karin arrinkaasi, oo waa wax aynnu wax ka qaban karno, se waxa aynnu u baahannahay in aynnu isbeddel bulsho, dhaqan, iyo mid haayadeedba ka samaynno gudaha Maraykanka, waana in nidaamka Dimuqraadiga ah ee rasmiga ah loo beddelo nidaam diimuqraadiga dhab ah oo cusub, kaas oo dhaafsan muuqa xilliyada doorashada ee ganacsatada iyo hantiilayaashu ay kula soo baxaan cidda danahooda u adeegaysa.

Maandhaq

- Dagaalku Waa Nabad!
- Addoonnimadu Waa Xorriyad!
- Jahligu Waa Aqoon!

Erey-bixinnadda siyaasiga ahi waxa ay leeyihiin laba macne, midi waa ka qaamuuska ee la isla wada garanayo, macnaha kalana waa ka u adeegaya aydiyoolajiyadda ninka xoogga weyn.

Tusaale ahaan, ereyga *‘Dimuqraadiyad’* macnihiisu waa in shacabku ka qayb qaato maamulka arrimihiisa. Balse midka awoodda badani waxa uu Dimuqraadiyadda uga jeedaa nidaam jeebweyntu ay go’aammada iyagu gaadhayaan, dadka intiisa kalana ay fiirsanayaan halkii ay ka qayb qaadan lahaayeen, sida uu xusay Waaltar Liibmaan ‘Walter Lippman.’ Bulsha weynta waxa loo oggolyahay keliya in ay ansixiyaan go’aammada ay gaadhaan kuwa iyaga ka sarreeyaa, ama in ay taageeraan marba qaar iyaga ka mid ah, laakiin waa in ay ka dheeraadaan wixii aan iyaga khusayn sida siyaasadda guud.

Haddii qayb bulshada ka mid ah ay iska joojiyaan dan darrada, oo ay bilaabaan in ay danaha guud u soo jeestaan, markaa ayaa Dimuqraadiyaddii musiibo ku habsanaysaa, ayna noqonaysaa in si uun looga takhaluso.

Aan tusaale u soo qaadanno (iska difaacidda weerarka). Markii Maraykanku uu lixdameeyadii ku duulay koonfurta Fiyetnaam, Adlaay Istiifensoon waxa uu sheegay: “In Fiyetnaamiyiinta koonfureed ay ka difaacayaan

in ay gudaha dalkeenna soo weeraraan.”
Macnaha reer tuulaha Fiyetnaam ayaa
ciidammada cirka ee Maraykanka weeraraya!

Kuwii waxaas oo masaafo ah u jaray in ay
difaacaan xukuumad tuugo ah, ma jirin cid reer
Fiyetnaam ah oo raalli ka ahaa, iskaba daa in ay
taageeraane!

Soddon sano kadib dagaalkaa lagu riiqmay,
ma jiro maanta cid ka hadasha gardarradaa uu
Maraykanku ku galay Fiyetnaam lixdameeyadii
iyo toddobaataneeyadii. Arrinkaas oo muujinaya
asluubaysi aan isaga oo kale la arag, kaas oo ay
tahay in ay ku faanaan kuwa dhawra
“iskujaangoynta siyaasadda.”

Tusaale u soo qaado ereyga ‘*Nabadda*.’ Qaar
nacasyo ah baa moodaya in taabbagelinta
nabadda Bariga Dhexe ay ku xidhan tahay in ay
Israa’iil fuliso go’aammada Qaramada Midoobay
ayna ka baxdo dhulalkii ay gumaysatay, iyo in la
iska garab dhiso dawladda Israa’iil iyo dawladda
Falastiin, si waafaqsan go’aammadii Qaramada
Midoobay.

Laakiin qolyaha dhawra “iskujaangoynta
siyaasadda” waxa ay iyagu qabaan in
Maraykanku uu joojiyo dhammaan marinnadda
nabadda, uuna siiyo Israa’iil taageero
siyaasadeed, mid dhaqaale, iyo mid ciidan
intaba.

Tusaalayaal badan ayaa jira, sida ereyga ‘danaha gaarka ah.’

Waaxda xidhiidhada guud ee Xisbiga Jumhuuriga ahi waxa ay siddeetameeyadii Xisbiga Dimuqraadiga ah ku tuhmeen in uu yahay xisbiga ‘danaha gaarka ah’ – dumarka, dabaqadda xoogsatada, waayeelka, beeraleyda yaryar, iyo si kooban, shacabka oo dhan.

Hal qolo oo shacabka ka mid ah ayaa aysan Jumhuuriyiintu ku darin in ay ka mid yihiin qolooyinka danaha gaarka ah leh: waana ganacsatada iyo haayadaha.

Se arrinkaasi si buu maangal u yahay, miyaa aysan haayadaha iyo ganacsatada waaweyni danahoodu ahayn danta ummadda!

Tusaalaheenna u danbeeya, ereyga ‘asaldhawr’ waa erey lagu tilmaamo kuwa taageera xukuumadda xooggan ee sida weyn u fara gelisa dhaqaalaha iyo nolosha bulshadaba, waxa ay difaacaan in xukuumaddu wax badan bixiso, suuqana ay sharciyo adag ku ilaaliso, sharciyadaas badanina waxa ay yareeyaan xorriyadda, waxa keliya ee mudnaanta ay siinayaanna waa dawladnimada lamataabtaanka ah. Haddaba, dadka asaldhawrka loogu yeedhaa barnaamijyadan uma ol’oleeyaan, waana barnaamijyada leh magaca ‘asaldhawr’ se waxa ay u ol’oleeyaan

barnaamijyo kuwan aynnu soo sheeganay lid ku
ah.

Warbaahinta

Kii ay doonto ha noqoto warbaahintu 'asaldhawr' ama 'libraali' waa uun haayado waaweyn oo waxsoosaarkooda suuqa ka iibiya. Suuqu waa kee? Iibsaduhuna waa kuma? Waxsoosaarukuna waa maxay?

Suuqu waa warbaahinta, waxsoosaarkuna waa daawadayaasha, haldoorka warbaahineed ee iyagu ah muunadda la raaco waxsoosaarkoodu waa daawadayaal haldoora.

Warbaahintu waxa ay soo jiidataa daawadayaal ay soo dabeen xayaysiisyadu, ganacsatuduna waxa ay warbaahinta ka iibsadaan daawadayaashaas.

Waxa aynnu leennahay shirkado waaweyn oo ganacsatada daawadayaasha ka iibiya. Haddaba ma aha wax lala yaabo in sawirka warbaahintu ay caalamka ka soo gudbinayso uu noqdo hummaagnoqd kooban oo u xilanaya danaha iyo qaayosoorrada ganacsatada iyo macaamiishooda.

Waxaa jira kooxo kale oo taageera suurad xumayntaa. Waxa ay qayb ka yihiin (tifaftirayaasha iyo qorayaasha wargeysyada) danlayda sedbursiga u saaxiibka ah ee maamula haayadaha iyo dawladda. Dhab ahaantii, waxa aad dhaadaysaa sida kuwa shaqooyinka sare ku

taxan ay ugu kala gooshaan haayadaha gaarka ah, xukuumadda, iyo warbaahinta.

Waxsoosaarka warbaahintu ma aha mid toolmoon. Si warbaahintu ugu adeegto danaha cidda lacagta dhiibaysa waa in ay qayb yar oo xaqiiqada caalamka ka mid ah oo inta loo oggolyahay ah ay soo gudbisaa. Marar badan waxa iska horyimaadda milgihii shaqadu lahayd, ammanadii, iyo shaqada ay warbaahintu hayso. Sidaa daraaddeed, qofka waxa u fudud in uu wax badan ka ogaado waxa warbaahintu soo gudbiso haddii uu fiiro dhumuc leh ku eego.

Warbaahintu waa qayb yar oo ka mid ah hannaanka aqooneed ee ay ka mid yihiin iskuullada, jaamacadaha, iyo meelaha aragtiyaha lagu faafiyo. In kasta oo ay adag tahay in hannaankan la diraaseeyo, haddana waxaa jira sababo dawgal ka dhigaya in aan aaminno in uu danahaa u adeegayo.

Hannaakaa aqooneed iyo caqiido, ee borobogaandada abuuraa, waxa uu leeyahay laba hadaf oo waaweyn:

Kow: Waa dabaqadda siyaasiga ah oo bulshada 20% ka ah, ee mutacallimiinta ah, xoogaa wacyigana leh. Waa kuwa kaalinta weyn ka qaata jaangooynta go'aammada, in ay iyagu aqbalaan borobogaandadana aad bay muhiim u

tahay, maadaama ay ku sugan yihiin boos ay siyaasadda ka qaabayn karaan.

Labo: 80% dadka intooda kale, ee liibmaan uu u bixiyay ‘daawdayaasha’ oo ah dhoohanayaal. Kuwan iyagu waa in ay ku dhaqmaan nidaamka, ayna ka fogaadaan dadka meeqaamka leh. Kuwan ayaa ah cidda dhabta ah ee ay warbaahintu abbaarto. Waa in dhoohanyaashaasi ay ka foogganaadaan xaqiiqada.

Inta aynnu horay u soo sheegnay kama dhigna in aysan dadkuna saamayn ku lahayn warbaahinta. Warbaahinta madaxa bannaan waxa ay qaadan kartaa kaalin weyn, waxa ayna u baahanaysaa uun maalgelin, laakiin waa ay yeelan kartaa muhiimadda ay leeyihiin oo kale ururrada rayidka ah, sida ururinta dadka taagta yar ee haddii la mideeyo wax qabsan kara, dhab ahaantiina, waa waxa ay diiddan yihiin kooxda talisaa.

Aayaha : Isbeddelka Waayaha

Xaalkii adduunku wuu isbeddelay soddonkii sano ee u danbeeyay. Tusaale u soo qaado maamulkii Kenedi iyo Riigan ee xagga siyaasadda isaga ekaa. Markii uu Kenedi qaaday ol'olihii borobogaandada ee uu ku canbaaraynayay 'argagixisada Kuuba,' waana judhii uu fashilmay ol'olihii gacanka doofaarta si loogu duulo Kuuba, kadib waxaa xigay taageeriddii argagixisadii koonfurta Fiyetnaam ka dagaallamaysay ilaa markii danbe Maraykanku dagaalka ku soo biiray, ma muuqan wax falcelin ah ilaa intii uu Maraykanku uu dirayay boqollaalka kun ee askari ee Indoo-Jayna burburiyay, tallaabadaa oo sababtay dhimashada malaayiin Aasiyaan ah iyo boqollaal kun oo Ameerikaan ah.

Arrinkaa waxa aad barbar dhigtaa markii maamulka Riigan uu go'aansaday in uu faragelin ciidan oo qayaxan ku sameeyo Ameerikada dhexe, kadibna ay shacabku arrintaa ka soo hor jeesteen heer dawladdu ku khasbanaatay in ay xal kale raadiso.

Hoggaamiyayaasha Maraykanku waxa ay ku tookhaan in ay ka soo gudbeen mushkiladdii Fiyatnaam, se waa ay ogyihiin waxa ka fiican. Waxa la helay warbixintii siyaasadda Amniga Qaranka ee maamulkii Buush kolkii uu

bilaabmayay dagaalkii Khaliijku, waxaana ka mid ahaa wixii ku qornaa: “Markii uu Maraykanku la dagaallamo cadaw aad u taag daran, muhiim maaha in la jebiyo oo keliya, se waa in la jebiyo oo dhakhso loo soo afjaro.” Haddiiba warbixntaas aad aragtay ma ceeb baa inoo dhiman?!

Amintan aynnu joogno faragelin ciidan suuragal maaha, keliya argagaxgelin kooban baa innoo bannaan, weliba kaas oo si qarsoon oo aan cidna ogayn loo fulinayo, ama in cadawga taagta daran si dhakhso ah loo soo afjaro, kadib marka lagu qaado ol’ole borobogaanda ah oo gebigiisaba ka dhigaya dugaag aan la loodin karin.

Maxaan Beddeli Karnaa?

Waddan kasta oo caalamka ah koox ayaa hoggaanka u haysa. Wax qarsoonna ma aha in kuwa go'aanka ka gaadhaya maalgashiga waxa la dhoofinayo iyo waxa la qaybinayo, ay yihiin kuwa sida dhabta ah Maraykanka uga taliya. Waxa ay doonayaan waa in shacabku iska dammanaado, heer xitaa haddii wax laga weyddiiyo noloshooda ay ku adkaanayso, iskaba daa qoridda dhambaallada, codaynta, iyo in la sameeyo dibadbaxyo nabdoone.

Qodobka muhimka ahi waxa weeye joogtaynta shaqada siyaasiga ah ee nidaamsan, iyo in cadaadiska la wado; si danaha guud loo hirgeliyo, waaya-aragnimana la kasbado si shaqada loo wanaajiyo.

Nidaam kasta oo xukun, haddii uu doono diktaatoori faashi ahba ha noqdee, wuu u hogtaa cadaadiska shacabka, waddankeenna oo kalana, dhab ahaantii, waa wax suuragal ka ah oo dawladdu uma caal hayso toosinta shacabka oo dhan.

Doorashooyinku ma aha keliya in qayb muwaadiniinta ka mid ahi ay dhawrkii sanaba ay badhammo taabtaan, se si ay macno u yeelato, waa in muwaaadiniintu ay lahaadaan aragtiyo iyo mawqifyo ay dhacdooyinka ka leeyihiin. Waxa intaas dheer, waa in ay leeyihiin

barnaamijyo ay ka rabaan in ay dawladdu hirgeliso, ayna ku cadaadiyaan kuwa metelaya in la taabbageliyo.

In saamayn lagu yeesho golaha baarlamaanka ayaa ka fudud in saamayn lagu yeesho golaha guurtida. Golaha guurtida oo saamayn lagu yeeshaana waxa ay ka fududdahay in madaxweynaha saamayn lagu yeesho, in kasta oo, sida caadiga ah, uu ka xayndaabanyahay in shacabku saameeyo. Heerkaa waxa gaadhi kara uun ganacsatada hodanka ah iyo kuwa awoodda badan leh.

Laakiin waxa aad awooddaa saamaynta golaha baarlamaanka. Waxa aad ku martiqaadi kartaa gurigaaga, ka dibna adiga iyo koox aad soo urursatay ayaa dhegaha kaga qaylin kara. Waxa kale oo aad geli kartaa xafiisyadooda. Siday noqotoba, adigu saamayn waa ku yeelan kartaa nimankaa.

Waxa kale oo aad cilmi baadhis ku samayn kartaa mushkilad kasta adiga oo aragti sax ah abuuraya. Waa arrin xoogaa dadaal ah u baahan, aadna bixin kartid, oo wax adag oo dahsoon maaha.

Gobannimadoonku Ha Socdo

Ma gebageboobin kashaqaynta xorriyaddu, caalamka saddexaad waxa uu u baahan yahay u diirnaxeenna iyo in aan fahanno, intaa ka badan waxa uu innooga sii baahan yahay in aynnu taakulaynno. Dulqaadkooda iyo hor istaagga ay hor istaagayaan dugaagnimadeenna waxa uu ku xidhan yahay waxa aan gudaha ka qabanno.

Geesinnimada ay muujiyeen waa mid la la amakaago. Waxa aan kansho u helay in aan ku soo arko koonfur bari Aasiya, Ameerikada dhexe, dheegga galbeed ee Falastiin, wax ka mid ah geesinimadooda. Waxa ay ahayd waayaaragnimo raad iyo ilhaamo weyn ii lahayd.

Yaa isleh waxani waa weedho qudha, oo aysan fahmayn tiro yar oo dadka caalamka ah mooyee.

Intani waa gabal yar oo ka mid ah hawsha innoo taal. Waxaa jira caalam saddexaad oo aad u badanaya. Waxaa jira nidaamyo aan sharciyad lahayn oo ka jira dhammaan daafaha caalamkeenna, dhan bulsho, dhan dhaqaale, dhan siyaasadeed, iyo dhan dhaqanba. Waa markii u horraysay ee sooyaalka aadanaha ay inna soo foodsaarto mushkiladda ah in la dhawro deegaan qaadi kara jiraal bini'aadan oo dhab ah. Garan maynno in dadaalkan daacadda ahi uu ku filan yahay maaraynta ama yaraynta

mushkiladdaa. Se waxa hubaal ah in dadaalkaa
la'aantii uu sababi doono musiibo weyn.